



**UN-HABITAT**

**Barnaamijka Degsiimada Aadamaha  
ee Qarammada Midoobay**



**3. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Go'aamiye**


**Taxanaha  
Tababarka**



**Komishanka  
Yurub**

**Xildhibaanka G/degaanka oo ah**

**Go'aamiye**



**Tilmaame-bare 3**

**Tababarka Hoggaanka la Doortay**

**Xarunta QM ee  
Degsiimada  
Aadanaha  
(HABITAT)**

# **Xildhibaanaka G/Degaanku markuu yahay Go'aamiye**

**Tilmaame-baraha 3aad**

## **Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Tarjumaddii: Jaamicadda Hargeysa**

**Taxanaha  
Agabaka  
Tababarka**

**Istanbuul, 1996kii “Shir-madaxeedkii Caasimadaha”**

**Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod,  
Naqshadda iyo jaan-goyntana Vicki Gillette**

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**HS/709/04SO**

## HORDHAC

Sida lagu muujiyey natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya madaxda (Xildhibaannada) la soo doortay ee Dawladda Hoose, ama se siyaasiyiinta gudaha, waxa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dawladda Hoose iyo maamulkeeda.

Sannadihii yaraa ee ugu danbeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paraguay ayaa ku tallaabsaday markii ugu horreysay muddo tobanaan sano ah, meelaha qaarna weligood markii ugu horreysay, hawsha doorashada Xildhibaannadooda Golaha Degaanka iyo Duqaydooda magaalooyinka. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA). Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HABITAT) waxay hore u dhigtay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xildhibaannada Golaha Degaanka in ay ka wakiilo noqdaan muwaadiniinta, siiyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaan ba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay sharxayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, is-gaadhsiin, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee Xildhibaanka Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.

Tilmaame-barahan, Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, waxaana loogu talog-alay bilow ahaan in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka waddaniga ah ee Dawladda Hoose ama se unugyada/waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dawladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Degsiimada Aadanuhu ( HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama lammaane/wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yidhaa "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doorto ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan. Waxaan filayaa in Tilmaame-barayaashani si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax-qabad ee Dawladaha Hoose, dhinaca unkidda dhaqammada hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeeddooyinkii waaweynaa ee 1996kii Shirweynihii Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha, Habitat II.

Waxaan u mahad-naqayaa Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W.Tees kaalintii ay ka qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HAABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xarunta QM oo ay taageero u fidsay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso talooyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow  
Kaaliyaha Xoghayaha -Guud  
Xarunta Qaramada Midoobay ee  
Degsiimada Aadanaha (Habitat)

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

iii

## AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhistada iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

---

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## HALKA UU KAGA JIRO TILMAAME-BARAHAN

**Bogga**

Sida loo isticmaalayo Tilmaame-barahan:

### Qaybta 1aad:

Qormo la xidhiidha Xildhibaanaka G/Degaanku markuu  
Yahay Go'aamiye

1

|                                      |    |
|--------------------------------------|----|
| Qeexid                               | 4  |
| Soo-ururin                           | 4  |
| Milicsi                              | 4  |
| Aragtiyaha iyo Fikradaha             | 5  |
| Macquul noqo                         | 5  |
| Ogaanshaha dhibaataada               | 6  |
| Ogaal iyo Higsad                     | 7  |
| Milicsi                              | 8  |
| Dhibaatooyin, Astaamo iyo maareyn    | 9  |
| Dhibaataadaada abbaar                | 10 |
| Gorfeyn dheeraad ah                  | 11 |
| Tayada iyo oggolaanshaha             | 11 |
| Natiijada                            | 13 |
| a warran Go'aan-qaadashada kooxeed   | 14 |
| Milicsi                              | 16 |
| Ka-feejignaan                        | 17 |
| Milicsi                              | 18 |
| Dabinnada go'aaminta ee kale         | 19 |
| Go'aan-qaadashada habsiino la'aaneed | 19 |
| Qodobbo muhiim ah                    | 21 |
| Raad-raac                            | 21 |

**Xildhibaanaka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

### Qaybta: 2aad

Aqoon-isweydaarsi Xildhibaanaka G/Degaamku markuu  
yahay Go'aamiyaha

22

|   |    |
|---|----|
| Muuqaal guud  | 23 |
| 3.1 Layli diyaar-garow: Liiska hubineed ee go'aan-doorashada    | 25 |
| 3.2 Bandhigga Tababaraha  | 28 |
| 3.3 Layli: Go'ammada san iyo kuwa xun                           | 29 |
| 3.4 Jilid: Go'aan qoondayn                                      | 33 |
| 3.5 Daraasad: La dagaalanka Musuq-maasuqa                       | 39 |
| 3.6 Diraasad-xaaladeed: Xarunta Dhexe ee basaska<br>ee Xanfaley | 41 |
| 3.7 Layli Gudbin xirfadeed                                      | 44 |

**SIDA LOO ISTICAMAALAYO TILMAAME-BARAHAN:**

Tilmaame-barahan saameeya “Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Go’aamiyaha”, sida kuwa kale ee taxanahan ka midka ah, waxa loo isticmaali karaa siyaabo dhowr ah.

**Diraasad kuu gaar ah:**

Qormada Tilmaame-barahan bilowga u ah waxa loogu talo-galay in qof kastaa isagu is-baro. Waxa qudh ah ee aad u baahan tahay waa meel aan buuq lahayn, oo aad ku fekerto, in waqti ah, iyo wax aad wax ku qorto. Si aad natiijo wanaagsan u gaadhid, waxaannu kugu dhiirri-gelinaynaa in aad ka jawaabtid su’aalaha hadba lagu weydiyo. Qiimahaaga aqooneed ee warku dhawr jeer ayuu u sii laban laaban karaa akhristaha waqti ku qaata in uu tan sameeyo.

**Tababarka aqoon-is-weydaarsiga:**

Qoraalka Tabababaraha iyo agabka layliyada ee Tilmaame-barahan waxa adeegsan kara, tababare waayo-aragnimo u leh tababar hawleedka lagu tababaryo xildhibaannada Golayaasha Degaannada ee kala duwan. Waxaannu ku biirinnay hawlo barasho iyo qaabab siiya tababaraha, jajabnaan dheeraad ah si uu tababar-hawleedka u waafajiyo baahiyaha Xildhibaannada ka qayb qaadanaay. Dejinta Tilmaame-barahan danta aanu ka lahayn waa in aannu kugu dhiirri-gelinno in aad ku dartid waayo-aragnimadaada tababarennimo si aad kor ugu qaaddo qiimaha barasho ee Xildhibaannada tababarrada ka qayb-qaadanaya.

Adiga oo tababare ah waxaad go’aamin kartaa in aad u adeegsato agab tilmaamaha sida ay u kala hormaysan yihiin iyo habke la soo ban-dhigay. Hase ahaatee, haddaad doonto dib-u-habayn iyo wax-ka-bedelba waad ku samayn kartaa agabka si baahiyaha iyo muraadka laga leeyahay loo wafajiyo xaaladda tababar kasta gaar ahaantiisa. Wax aad dooran kartaa in aad bixiso saddex saacadood oo tababr ah, adigoo isticmaalaya layliyada iyo hawl-qabadyada tilmaamaha. Ama waxaad ka faa’iidaysan kartaa waxyaalahan badan ee tilmaamaha adigoo ku kaabaya waxyaalo ay aqoontaadu ku siiso, si aad u gaadhsiiso mudada barnaamijka maalin dhan.

Tilmaame-barahani wuxuu ka mid yahay taxane 12 ah oo loogu talo galay hoggaaminta la doortay. Waxaad go’aansan kartaa ama lagaa codsan karaa in aad fuliso tababar hawleed u baahan in aad adeegsato tilmaamayaal mid ka badan ama 12ka tilmaame oo dhanba muddo ka dheer waqtigii mid loogu talo-galay iyadoo tilmaame kastaa gaar ahaantiisa loo isticmaali karo, wax weyn bay kordhin kartaa haddii loo gudbiyo siday u kala horreeyaan, barasha ku dhafan waayo-aragnimada xildhibaannada ka-qayb galayaasha.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go’aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**



**Tababar-kooxeedka:**

Sida doorbidan wax yaalahaas waxa kale oo lala isticmaali karaa, taageerada tababare ama hage wayo-arag ah, si kor loogu qaado wax-qabadka xildhibaannada u wada adeega is-maamul keliya. Marka la tababrayo xildhibaanno wada shaqeeya waxaannu rumaysan nahay in hagaha tababar ku uu diyaaar u yahay in uu si kale u abaabulo hawwlaha tababar ee tilmaamahan. Waxa jiri kara waqtiyo adigoo fududeeyayaasha ah aad doorbiddo in aad ku kordhiso hawlo kale kuwaas oo ay keeni karaan xaaladaha iyo tilmaamaha kooxdu.

Waxaannu ku rajo weynannahay xaaladdu la mid tahay markay kula kulmaan in aad tilmaamahan baro u adeegsatid sanduuqa baanadaha tilmaamahan bare waxa ku jira doorashooyin aaraa' tababar oo laysku dari kara, bar-bar dhigi karo, la beddeli oo la iska tuuri karo, hadba xaaladaha ta ku habboon. Doorashooyinkaas faraha badani oo aad ka dooran karto tilmaamayaasha tababarba. Waxaannu kuu rajaynaynaa si buuxda uga faa'iidayansaysid.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## **Qaybta 1aad**

### **Qormada**

## **Xildhibaanka G/Degaanku markuu**

## **yahay Go'aamiye**

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Qeexid**

Xildhibaan kaalintiisa go'aamiye waxay ku dhisna tahay maskaxdiiska/leeda marka ay jiraan kala doorashooyin mawqifyo.

**Soo-ururin:**

Maqaalka, waxaynu ku baadhi doonaa qaar ka mid saamaynta ifafaalaha gp'aan qadashadu ku reeb xildhibaan degaan oo la doorto. Tusaale ahaan waxaynu axadhi doonaa siyaabaha ay kooxoo u go'aan qaataan; talaabooyinka kala duwan ee habraaca go'aaminta, carqaladaha ku yimaadda go'aannada wax-ku-oolka ah, iyo sida aad u hagaajiso xirfadahaaga go'aan-qaadashada golaha.

**Milicsi:**

Marka aan ka fekerno kaalinteyda ah go'aamiye ee golaha, waxa markiiba maskaxdeedu ku soo dhaca:-

|                                     |
|-------------------------------------|
| 1. _____<br>_____<br>_____          |
| 2. _____<br>_____<br>_____          |
| 3. _____<br>_____<br>_____<br>_____ |

Xildhibaan ka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

**Aragtiyaha iyo Fikradaha:**

Isku-dayga ah in la qeexo Go'aamiye, sababo dhawr ah awgeed, ayaa ahayd arrin adag. Malaha waxa u sabab ahaa innaga oo aan maskaxdeenna u raaridin. Qeexidda aannu ka bixinnay kaalintaada Go'aamiye waxay u muuqataa in ay meesha ka saartay go'aamiminta ay qaataan guddiyo, kooxo, ururro iyo beeluhu, in kastoo go'aammada noocan ahi ay yihiin kuwo qiime u leh madax kasta oo la soo doortay.

Hase ahaatee go'aan kasta oo ay kooxi qaadataa waxa uu koobmaa go'aammo ay dadka ay khuseysaa qof-qof u gaadhaan. Haddii aynu, Golaha tusaale u soo qaadanno xildhibaannada la aamusaa codayntoodu, dhab ahaan waxay yihiin kuwa go'aansaday in aanay codayn; taasoo ah go'aamin ah in aanu codayn, waxaanay tahay go'aamin uu ka badheedhay.

Maxaynu ka yeelnaa maqnaanshaha go'aamintaas oo iyada nafteedu inta badan go'aamin ah? Go'aansashada in aanaad go'aan qaadan, waa arrin wer-wer leh, sida aad og tihiin intiinna Golayaasha Degaanka ka tirsani.

Ka-baxsiga ama baajintu waa tabo, xeelado ama istaraatejiiyado go'aan-qaadashado oo dhab ah. Waa go'aammo xataa haddii ay yihiin go'aammo laga gaadhay in aan arrin jirta wax laga qaban. Ka feker go'aammada Golahiinna. Ma jireen marar aad go'aan gaadhi kari weydeenay adiga oo xubin ka ah koox, oo aad markii danbe ogaateen in go'aan-qaadashado la'aantaasi ahayd mid meesha ku habboonayd. Go'aan-qaadashadu waxay noqon kartaa arrin murugsan.

**Macquul-noqo:**

Adigoo ah xubin Gole ah immisa jeer ayaad maqashay abhintan? Waxa laga yaabaa in aad in door ah maqashay, sababta oo ah haya'adaheennu waxay qiime weyn saaraan xukunka iyo go'aaminta caqli-galka ah. Waxa iyana jirta fikrad ay wadaagaan ummado badan oo ah in loo hawl-galo sida ugu dhow ee ugu macquulsan, siiba marka la eego go'aan-qaadashada ururrada rasmiga ah. Isirrada caqli-galnimada xaduud ma laha, waxay iskaga tallaabaan xuduudaha siyaasadda iyo dhaqanka. Qaabkan wax loo qabanayo ee qarniyada soo jirey wuxu ka soo jeedaa xadaarado ku habaysan qaabkii soo jireenka ahaa oo ay weli qaybo adduunka ka mid ahi ku dhaqmaan. Meesha ugu sarraysaa ee xalaasha waxay gaadheen qarnigii aynnu soo dhaafnay ee soo ifbaxii "waaga caqli galnimada". Maadaama ay caqligalnimadda tiirka ay cuskadaan alkumayaasheenna rasmiga ahi, sida Goleyaasha la soo doortay, waaynu eegi doonaa qaar ka mid ah tilmaamaha go'aaminta ku slaysan hab raaaacan.

Habraaca go'aaminta maangalka ah, sida y qorayaalo badani ku sifeeyeen waxa ka mid ah talaabooyinkan:

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

- € Ogaanshaha dhibaataada
- € Gorfeynta Dhibaataada
- € Dersidda Badiilladaa
- € Go'aamin

Waa jaan-tus wanaagsan oo inna siin kara jihayn iyo feker innaga caawin kara inaynu inta badan qaadanno go'aammo wax-ku-ool ah. Laakiin waxa jira siyaabo uu jaantuskani uga faa'iidayn karo waxoogaa dod ah. Aynnu marba tallaabo talaabo u eegnno.

### **Ogaanshaha dhibaataada:**

In la ogaado ama la helo dhibaataada laga arriminaayo inta badan ma fududa. Taasi waa talaabada ugu horreysa habraaca caqli galnimada ee go'aaminta. Adiga oo ah xildhibaan gole waxa kuugu muuqda dhibaato, waxa la arkaa inaanay dadkii ku soo doortay ama xildhibaannada qaar kood aanay ugu muuqan dhibaato. Ogaanshaha dhibaato, siiba marka laga hadlayo xildhibaan la soo doortay, waa in ay si aad ah ula xidhiidsanaadaa helidda fursad.

Xal-u-helidda dhibaato waxay inna tusaysaa in wax qaldan yihiin una baahan tahay in la daweeyo. Helidda fursado iyo ka faa'iidaynigeedu waa arrin togan. In kastoo labada siyoodba ay kaalin ku leeyihiin xilkaaga go'aamineed; haddana fursado aad heshaa waa dhiirrigelin iyo wax-soo-saar kordha muddada dheer. Waa kuwan kala duwanaansho u dhexeeya laba ka sababa xaaladaha go'aaminta.

### **Xildhibaan G/Degaanku markuu yahay Go'aamiye**

Inta badan dhibaatooyinku waxay ku jihaysan yihiin hagaajin (hagaaji, xal-u-hel, dhammaystir). Waxay ku kala duwan yihiin, fursaduhu waxay liishamaayaan horumar. Badiyaaba fursadu waa dhib. Waxay leeyihiin khataro iyo hubatiin li'i. Suuragal ma tahay? Ma shaqayn kartaa? Haddii ay shaqayso, faa'iidaoyin ma leedahay?

### **Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Dhibaatooyinka haddii aynnu eegnno, khatartoodu waa iyada oo la xalili waayo. Fursaduhu waa arrin mustaqbal, khatartooduna waa ku in lagu xisaabtama mustaqbalka lana saadaalin karin.

Dhibaatooyinku waxay leeyihiin taariikh waa hore ah, oo laga shidaal qaadan karo. Natiijooyinka xalinta ama xal la'aanta dhibaato waa la saadaalin karaa. Marka aynnu fursado baadigoobaynno, su'aasha badiyaa lays weydiiyaa waa: bal haddii? Marka aynnu dhibaato xalilayno, su'aashu waa "Waayo?" Dhibaatooyinka waxaad u doontaa xalinta, fursadahana waxaad baadhi doontaa waa faa'iidooyin.

Adiga oo xildhibaan ah, inta badan waad iska dhaafi kartaa fursadaha in aad dhibaatooyinka dhabarka u soo jeedisaana wey ka sii adag tahay.

Fursadaha marar baa lala kulmaa, hase ahaatee  
mar walba ku lama joogaan.  
Maahmaah Nepaali ah

### **Ogaal iyo Higsad:**

Inkasta oo ogaanshaha dhibaatooyinka iyo fursadaha loo arki karo tallaabada ugu horreysa hab raaca go'aaminta caqli galka ah, waxaannu rumasysan nahay in ay jiraan wax ka horreeyaa. Ma aha tallaabo ka mid ah tallaabooyinka hab raacan, waxayse tahay wax lagu tilmaami karo maan-gal, ama sida ay wax kuula muuqdaan. Arrinta aynnu ka hadlaynaa waa baahidaada xogogaalnimo iyo higsadkaaga. Sida fursadaha iyo dhibaatooyinka oo kale, ayay ogaalka iyo higsadku u sahlan yihiin in lays garab dhigo. Ogaal waa in aad aragto "wax ah", halka uu higsadku yahay "waxa uu noqon karo". Ogaal waa tab, muddo-gaaban oo gaar ah, halka uu higsadku ka yahay muddada dheer, oo aragti ahaan tusmaysan (Istraatiyeysan). Ogaalku wuxuu eegaa qaybaha dhibaato, halka uu higsadku midabeeyo "sawir weyn". Ogaalku wuxuu isku hawlaa fikirka meel isugu soo shubmaya, halkuu higsadku heerkiisa ugu sareeya gaadhaa marka ay fikrada-heenna ay kala taagan yihiin ama kala firidhsan yihiin.

Ogaalku badiyaaba waa hawl xooggan oo si xidhiiddhsan u hawl in uu degaanka ka helo furayaal u fududeeye xal-u-helidda dhibaato, halka uu higsad wanaagiisa aynu helo marka uu fikirkeenu ka talaabo deegaankeenu.

Ogaalku waa wax maangal ah, wuxuuna ka yimaadda dhinaca bixidix ee caqligeenna, halka uu higsadku garaaco dareemadeenna dhinaca midig ee qalbigeenna. In kastoo labadan hab raac ee fikirka loo baahan in ay xoojiyaan xirfadaha iyo akhlaaq ka xildhibaannada, waxaynnu ku doodi karnaa inay yihiin laba khusladdood tilmaamood oo kala duwan.

Ogaal iyo higsad ba waa laba xirfadood oo hogaaminta qiime u leh. Mid waliba wuxuu leeyahay agabkiisa, haddana marka laysu geeyo labadoodu waxay qeexaan waaqica aynu ku noolnahay. Isla markaas waa aasaaska aynnu ku qaadanno go'aammada la xidhiidha xallinta dhibaatooyin iyo ka faa'iidaytsiga fursadaha.

Si aynnu u soo ururinno doodeenna, go'aamintu waxay ku salaysan tahay hab raaca fikirka, badiyaaba la xidhiidha-

- a) Caqli-galnimada;
- b) Dhibaato furdaaminta;

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Hase yeeshee furdaaminta dhibaato waa qayb keliya oo ka mid arrimahan horyaal xubin gole. Waa in aad beeshaadda u baadi goobtaa fursado. Taasoo u baahaan xog-ogaalnimada xaaladda beeshaada, ee hadda iyo higsadka sida uu noqon karo.

Mararka qaarkood waxa habboon in la ogolaado in fursaduhu ay wadada u banneeyaan, dareenka iyo khayaalka, oo la joojiyo su'aalaha "waayo?" iyo sidee haddii ay?

Doodda ku saabsan ogaalnimada iyo higsadku waxa kale oo ay wax ku biirisaa laba qaab oo go'aan-qaadasho ah, kuwaas oo la xidhiidha fikirka falcelinta ah iyo ka-hor-degga go'aaminta oo ku ku salaysan xaaladaha mustaqbalka oo aan si buuxda loo fahamsanayn (go'aaminta fal-celinta ahi waxay ku salaysan tahay) xoggo taariikh ah, iyo kuwa hadda jira. Labaduba waxay lagama maarmaan u yihiin gole wax-ku-ool ah. Haddaad tahay xildhibaan waxa lagama maarmaan kuu ah in aad fahamto siyaabaha uu golahaagu u go'aamiyo. Adiga iyo xildhibaanada kalena waxaad ku niyad santihiin in aad inta badan noqotaan kuwa ka-hor-dega, mise fal-celiya marka aad adeegsanaysaan hab raacyada go'aaminta? Waxaanu tuhunsanahay in ay jawaabtiinnu tahay fal-celin waayo waxa idinla soo dersay dhibaatooyin is-biirsaday oo aad ka dasheen goleyaashii idinka horeeyey.

Hase ahaatee in aad noqoto go'aamiye ka-hor-degaan dhaxasheen waa lagama maarmaan, xattaa marka aad ku hawalan tahay dibaatooyin soo jireen ah. .Ka-hor-degnimada waxay kaa caawisaa hal-abuuridda furdaamino cusub.

### **Milicsi:**

In yar ka feker sida aad u guda gasho xilkaaga xilldhibannimo. Ma waxaad tahay dadk u xagliya in ay arrimaha aku eegaan dhinaca ay dhibato ka yihiin mise dhinaca ay fursadda ka yihiin. Metal, ma waxaad tahay qof awoodda ay dawladda maxaliga ahi ku maareyso arrimaha bulshada ka samo-fishe mise waxaad tahay xumo-fishe.

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

|  |
|--|
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |
|  |

**Dhibaatooyin, Astaamo iyo maareyn**

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

Musdhkiladda joogtada ay taala kulmaa marka la go'aaminayo furdaamin dhibato waxay tahay in xal loo doono astaamaha dhibaataada, halka xal looga dooni lahaa dhibaataada nafteeda. Nasiib darro furdaaminta astaamaha dhibaato, ma xalisho dhibaataada dhabta ahayd ee la furdaaminaayey.

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Tusaale ahaan, haddii Dawladda Maxaliga ahi ay hoygaaga waddada hor marta rag-ragcayaan iyada oo aannu jirin asaas habbooni, waxa Dawladda Maxaliga la soo dersaya shaqo aan dhammaanayn. Waxa kale oo la arkaa in kharashka ku baxa aqabka waxa lagu rag-ragcaayo iyo shaqaalaha rag-ragcayaaba ay ka bataan kharashka ku bixi lahaa marka si dhammaystiran loo dayactiro, dhibaataaduna sannado dhawr aanay aan u baahan wax-ka-qabasho.

Dhibaataada qudha, sida aad sheegtay, waxay tahay lacagtii loo baahnaa oo aanad hayn. baabuurleyduna si joogto ah ayey cabashooyin ugu gudbiyaan xubnaha golaha iyaga oo leh "waa in arrintan wax laga qabtaa. In kasta oo mararka qaarkood ay qasab tahay in astaamaha dhibaato la gurfeeyo, goleyaasha waxa la gudboon in ay ogaal u noqdaan fursadaha kharashka ay la iman karaan. Waxa iyana caan ah marka arrin la go'aaminayo in ay iska hor taagaan arrimo la xidhiidha markii aad baadi soocaysay dhibaataada, taas oo ah adiga oo u asteeyey



xallinta dhibaato, dhibaataada lafteedii. Metal golihiinnu wuxuu odhan karaa “waxaynu u baahan nahay in aynu iibsano bulldozer iyo grader” si aynnu u hgaagjinno jid cadde degmada ku yaalla.

Tani ma dhibaataadii baa mise waa furdaamintii dhibaataada? Mar haddii uu goluhu go’aamiyey in qalab la’aantu tahay dhibaataada, waxay meesha ka saareen siyaabihii kale ee loo hagaajin lahaa jid-caddaha. Kuwaas waxa ka mid ah dayactir ku slaysan shaqaale, siinta qandaraaswale degaanka ah, hagaajinta jid-caddaha, iyo isku-dubarididda shaqada si ay u fuliyaan kooxo jid-cadaha deris la ihi.

Haddii aynnu si kale u dhigno, marka go’aan la qaadanayo waxa lama huraan ah, in aad is-weydiisaan in aad run ahaan daba ordaysaan astaamaha dhibaataada iyo inaad dhisaysaan furdaamintii dhab ahaantii aan xal ahayn. Dhif iyo naadir ayay labada siyood ee kor ka qorani faa’iido saamayn muddo dheer ah yeeshaan. Dariiqo laga baxo laba aabudh kan waa idinka oo la hadla dhibaataada.

### **Dhibaataada abbaar:**

Sida ugu wanaagsan ee loo hubiyaa inaad dhibaataada liishaamaysidoo aanad ku fooganayn astaamaha ama furdaaminta waa “adiga oo la hadla dhibaataada”, oo weydiya su’aalo badan.

Waxa iyana talaabo habboon ah, in aad bilawdo wajiga gorfaynta dhibaataada ee hab raaca go’aan-qaadashada. Si aad u noqoto go’aan-qaate wanaagsan, waxaad u baahn tahay in ay kuu caddaato waxaad ka go’aan qaadanaysaa.

Go’aan qaadashada ku waajahan furdaaminta dhibaato waxa inaga caawin kara adeegsiga su’aalaha soo socda:

- € Waa maxay dhibaataada aynnu furdaaminaa (inta badan waxa la arkaa in aanay jawaabtu ahayn mid cad.)
- € Maxay tani dhibaato u tahay?
- € Kooxaha danaynayaaa waa kuwee? (Waxay kaloo ka mid noqon karaan xal-u-helidda mustaqbalka)
- € Xagay dhibaato ku tahay? (ma qaybta aan deggan nahay mise waa dhibaato guud).
- € Goorma ayay tahay dhibaato? (ma mid xilli baa mise waa mid Isniinta oo keliya dhacda?).
- € Muddo intee le’eg bay dhibaa ahayd? (ma muddo dheer bay jirtay? (hadday mudo soo jirtay waxay sheegi kartaa awoodda wax-qabad ee Goalayaashii idinka horeeyey ay u lahaayeen xallineeda).
- € Maxaa dhici kara haddii aannu Golaha waxba ka qaban furdaaminta dhibaataadan? (tani waa su’aasha ugu mudan. Haddii aad mala-awaashid inaan waxba dhacayn, ma aha arrintu mid mudnaan leh).

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go’aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Gorfeyn dheeraad ah:**

Su'aalaha kor ku xusani waa dariiqa ugu wanaagsan in aad ku gorfeyn karto dhibaato ama fursad. Ka jawaabista su'aalaha kama heleysid warka iyo xogta oo keliya ee ay u baahan tahay xal-u-helidda dhibaato, ee waxa suuragal ah in aad go'aansato in aanad doonayn, ama aanad u baahnayn in aad wax ka qabato xallinta dhibaataada waqtigan la joogo. Xaaladan ookale, qorfeyntu waxay kuu hogaamisay gebogebo, lagana yaabo inay tahay mid caqli gal ah oo aad adiga iyo qarykaaba la noolaan kartaan.

Haddii aad talaabooyinka xog-helidda adeegsatay, aadse weli u baahan tahay inaad baadhis dheeraada ku sameyso dhibaataada, sida u wanaagsan annu helay in lagu gorfeyn karo xaaladda waa inaad deristo xoogagga dhibaataada in la xaliyo ka hortaagan, iyo kuwa loo abaabuli karo xallinta dhibaataada. Waxa jirta aragti ku saabsan xal-u-helidda dhibaato oo odhanaysa (arrin kastaa waxay ku ekaan kartaa xaalad deganaansho isu-dheelitiran oo ay dhalinyaan xoogagga xaalada wada iyo kuwa ka soo horjeeda ee hoganaya eek u wareegsan xaaladda. Haddii aad xoojiso xoogagga wada xaaladda ama yarayso ama meeshaaba ka saarto xoogagga hagani xaaladdu, waxa suuragal ah in ay yimaadaan isbeddelo loo riyaaqaa. Waa layli fudud oo la xidhiidha gorfeynta dhibaato, oo si waxtar leh u shaqeyaa.

Mar hadaad dhibaataada ama fursad forgeysay oo ay ku raali geliso, waxa la gaadhay waqtigii laga fekeri lahaa siyaabo ama doorashooyin kale oo kuu fududeeya go'aaminta kama-dambaynta ah.

Fiiro gaar ah u yeelo inay suurtagal tahay in aanad dhamaan weligaa wada heli karayn xogta iyo wararka aad ugu baahan tahay inaad go'aan ku gaadho. Gorfeynta xoogagga saaxada ka jiraa, badiba waxay kaa caawin karaan in aad badiillo hesho.

Metalan waxa laga yaabaa in sida ugu wanaagsani tahay iyadoo meesha laga saaro mid ama ka badan xoogagga xalinta dhibaato hortaagan, isla mar ahaantaasna la kordhiyo xoogagga xalinta dhibaataada wado ee hore loo arkay inaad faa'iido leeyihiin.

**Tayada iyo oggolaanshaha:**

Laba cabbir ayaa ku habboon in lagu qiimeeyo filashada wax-ku-oolnimada go'aankaaga. Kuwaasi waxay yihiin:

- 1) Tayada go'aaminta, iyo
- 2) Oggolaanshaha laga helo kuwa fulinaya ama kuwa ay saamayn karto.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Labaduba waxay saamayn ku yeelaan karaan go'aanka kama dambaysta ah,

Kaas oo isla markaas u bahan in maanka lagu hayo marka aad ku soo dhowaato go'aanka. Tayada go'aamintu waxay ku tiirsan tahay tiro isirro. Isirradaasi waxa ka mid noqon kara:

- € **Abbaaridda yoolka:** go'aanka aynnu qaadannay si ina raali gelisa ma ku gaadhaynaa hadafka?
- € **Helitaanka kheyraadka:** Ma haynnaa khayraadii (lacag, qalab) aynnu ku hirfgelin lahayn go'aanka.
- € **Muddaynta:** waqtigu ma yahay mid habboon? Siyaasadda dawlad waqti ayaa wax walba ah.
- € **Suuro-galnimada:** go'aanku ma yahay mid la fulin karo oo suurtoagal ah. Mararka qaarkood iyadoo shuruudihii kale ay dhan yihiin, ayayna ahayn suurtoagal marka laga eego xag fulineed. Mara kalena sababta ama sababaha ay u suurtageli wayday aanay ahayn kuwo maangal ah.
- € **Habboonaanta:** go'aanka ma yahay mid habboon oo ku gaadhsiin kara hadafkaaga (xallinta dhibaata?).

### **Metelan:**

Waxaad ogaatay in baabuurka aad wadday oo sida khudrad ay banjar ka yihiin laba taayir. Waxad go'aamisay in aad markiiba dirto ninkii kaala shaqaynaayey si uu labada taayir midkood u soo banjariyo. Waa go'aan suurtoagal ah, waqtiguna waa habboon yahay, waa laga yaabaa in kharashkii lagu banjariin lahaa la heli karo, hase ahaatee waxa hubaal ah in aannu go'aan ku habboonayn, innaga oo og in laba taayir ay banjar yihiin. Waxa jira siyaabo kaleoo kaa caawin kara oganshaha in tayada go'aan kaagu yahay mid habboon. Waxay ku xidhan tahay go'aankaagu waxa uu yahay. Ha ka waaban inaad go'aan kaaga ku heshid wixii aad ku gaadho bahiyahaaga. Waqtigan xaadirka ah tayadau waa qodob aad ugu weyn wax soo saarka, waxayna leedahay micne gaar u ah, taasoo ku xidhn tayada wax-soo-saarka shirkadda.

Mar haddii go'aannada ku saabsan siyaasadaha, barnaamijyada bulshada, iyo qoondaynta khayraad dabnat geyd ay yihiin wax soo saarka goleysaasha, waxa faa'ido ah in aad qaadata aragtida guud ee loo yaqaan DHAQ-DHAQAAQA MAAREEYNTA Dhammaystiran ee TAYADA, si aad u aragtid tilmamaha tayada.

Qoraal ayaa laba odhaahood ku soo koobay sida ereyga TAYO uu ugu xidhan yahay maareeynta dhammaystiran ee Tayada.

- € In ay waafaqaan tilmaamaha gaar ahaaneed. Tayo waxa qeexa in aanay dhaliil lahayn ilaa xad,
- € Inay buuxiso doonidda iibsadaha. Tayo waxa lagu qiyaasaa heerka uu iibsaduhu raali ku yahay tilmaamaha habka uu u samaysan yahay.

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Waxa jira shuruudo adag oo ay tahay in uu buuxiyo qidaaca dawladdu. Waxay kobciyaan fikirka shaqaalaha ku hawlan kor-u-qaadidda tayada adeegyada iyo soo saarka qidaaca dawladda.

Cabbirka kale ee aannu u soo bandhigaynaa in lagu go'aamiyo wax-ku-oolniida go'aan-qaadashada waa iyada oo ay aqbalaan kuwa:

1. Masuulka leh fulinteeda;
2. kuwa saamaynaysa.

Waxa la wada og yahay ka qayb gelinta hab raaca go'aaminta kuwa ay saamaynayso go'aamintu inay tahay lagama maarmaan in ay faham u yeeshaan go'aaminta aad sababata loo qaadanayo ay difaacaan. Labada qodob waa sabab kuligeen ku filan inaynu si aad ah uga fekerno cidka ku hawlanaan doonta mar kasta oo aynnu go'aan qaadanaynno go'aan dadka kale samayn karo.

Dhinaca ayada go'aan inta badan waa ooo u hogaansan fekerka maangalka ah. Aqbalkeedu, iyana, waa oo ka ekeada saaxadda isbedelka debceecadda qofka. MARM QAARKOOD TILMAAMU WAA ISKU LID.

### **Natiijada:**

Arrin kale oo la tixgeliyaa marka la hayo hawsha go'aan qadashada waa saamaynta la filaayo in ay yeelato go'aaminteed. Gole wuxuu ka hawlanaadaa saaxada guud sidaas darteed waxa ka badiba jira in ay go'aan qaadasho yeesho haraatiyo badan. Kuwaas waxa noqon karaan kuwo togan ama taban, sidaas darteed ay lagama maarmaan tahay in aad labadab haraatiyahooda ku fekertid marka aad go'aaminta kama dambaysta jidkeeda haysid. Harraatiyuhu/natiijooyinka waxay noqon karaan kuwa jirtaankoodu yahay muddo gaaban iyo kuwo muddo dheer.

Taasi oo ay habboon tahay in la tix-geliyo. Ugu danbayn natiijooyinku waxay u kala baxaan qaybaha soo socda:

- € dhaqaale
- € bulsho
- € deegaan/sabo
- € dhaqan iyo siyaasad.

Nasiib wanag, go'aaminaha oo dhammi ma laha haaraatiyaha kor ku taxan, haddii kale go'aan qaadashadeena adeegga guud ayaa cidhiidhi geli lahayd.

Goob ama degmo khayraadku naadir ku yihiin, waxa loo baahn yahay in la tixgeliyo wax dhaqaaleyahannadu ugu yeedhaan "Fursada kharashaadka" ee go'aannadeenna.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Maa daama go'aan kastaa xanbaarsan yahay in khayraad cidhiidhi ah lagu fuliyo hawl gaara ama goob adeg, go'aanku muusan ahayn inaan loo adeegsan khayraadkaas laftooda in wax lagaga qabto dhibaato kale. Tusaale ahaan, waa maxay Fursadaha Kharashaadku. Haddii Golihinna go'aamiyo in maaliyadii yarayd ee ay haysteen ay ku dhisaan xarun wadne beddel, halkay ka gelin lahaayeen wacyi-gelinta ka hor-tagga cudurka AIDS-ka si kale oo loogu fekeraa go'aannadan waa iyada oo diiradda la saro qiimahooda lacageed ee waqtiga dheer iyo kharaskha laga filan karo. Faa'iidada iyo kharashka badan ee lagu bad-baadinayo dhawer nafood iyada oo wadnaha lage beddedlo; waa in la garab dhigaa barnaamijyo badbaadin kara nafo badan oo midkiiba ku kacayo qiime aad u yar. Si kale haddii aynnu u dhigno waa maxay kharashka fursadahas ee maal-gelinta go'aannadu?

Haddii aad raacdo talaabooyinkaas, oo aad kasocod ogaal iyo higsad, waxaad awoodi kartaa in aad hagaajisid awoodaaada go'aanqaadasho.

Hel dhibaataada dhabta ah oo fursadda, si deggan u gorfee. Caddayso siyaabaha kala duwan oo aad u furdaamin karto.

Dooro mid oo ka feker natiijada hir-gelintooda

Hel aqbalaadda kuwa qaadaya masuuliyadda hir-gelinta iyo kuwa ay saamayn doonto. Ka dibna go'aami. Haddii aad hab raacan adeegsato, go'aannadaadu waxay ku danbayn doonaan guul.

### **Ka warran Go'aan-qaadashada kooxeed:**

Waxaad shaqaysaa adiga oo xubin Golaha deegaanka ah, oo aad go'aamada u qiimo badan qaadataa adiga oo xubin kooxeed ah. Waxii bahan oo aynnu ka soo doodnay waxa loo adeegsan karaa go'aan qaadashada qof ama koox. Waxaynu hadda doonaynaa in aynnu lishaanka saarro go'aan qaadashada kooxeed. Sannado badan ka hor ayey synisyahnnadda dabeecadda qofka, bilaabeen inay cilmi badhisyo ka sameeyaan isla xidhiid dadka iyo dabeecadda kooxda, iyadoo eegaaya, cajaladah duubiya isla markaasna gorfeynaayaa is-dhex-galladaas.

Cilmi-baadhistaa waxa ka soo baxay aragtiyo la xidhiidha asluubta aadamaha, taasoo fududeyn karta in is-dhex-galka dhexdeenna ahi uu ahaado mid wax-ku-ool ah. Hoos waxa ku qodobaysan natiijadii ka soo baxday go'aamin kooxeed, sida uu ku soo weriyey Edgar Schein buugiisisa "habraaca la-tashiga" Processa Construction. Schein wuxuu tilmaamay siyaabaha soo socda ee kooxi go'aan u qaadata.

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Schein wuxuu yidhaahdaa:-

- € Go'aan-qaadasho lagu gaadho fal celin la'aanta tan dhacda marka uu qof soo jeediyo ra'yi hase ahaatee aannu qofna eray ka odhan.

Wax-ka-dhihid la'aan ayay kooxda go'aansatay in aanay go'aanka taageerin.

**Go'aamin ku timi wax-ka-dhihid la'aan**

Tani waxay dhacdaa marka uu qof arrin soo bandhigo, hase ahaatee aan cidina cod diidmo ah iyo mid taageero ah toona ku biirin. Schein wuxuu yidhaahdaa, odhaah li'idu waxay tilmaamaysaa in kooxdu go'aamisay in aan la taageerin ra'yiga ama soo-jeedimaha. Kuligeedna way inna soo martay "hoo-ruug".

**Go'aamin ka timi awood rasmi ah, ama awood isa-siin qof ahaaneed**

Go'aan-qaadahasda noocan ahi waxay caan ku tahay goleyaasha marka Duqu ama Guddoomiyuhu uu gudbiyo amarro, si loo qaato go'aan gaar isaga oo ku hadlaya magaca kooxda.

**Go'aan lagu gaadhay tiro-yari**

Marna ma ku fekertay in qof kale kugu sandulleeyey go'aan? Waa suurta gal, marar badan ayay tani dhacdaa marka ay dhawr qof isu taagaan si ay arrin u go'aamiyaan. "Qof diidani ma jiraa? Waa dhan tahay ee aan hor u soconno" ama erayo la mid ah oo ka soo yeedha, qofka arrinta hogaaminaaya, ama hogaamiye is-magacaabay, taasoo ku geyeysiisa in lagu shaabadeeyo go'aan ay dhawr qof wateen.

**Go'aan ku yimi aqlabiyad sharci ah**

Tani waa habka caadiga ah ee go'aan gaadashada ee ay adeegsadaan golayaasha sharci dejintu ee adduunka intiisa badan.

Inkastoo laysku raacsan yahay habkani la wada aqbalsan yahy, uuna yahay habka ugu habboon ee go'aan-qaadashada; dhibaataadiisu waa isaga oo badiba kala qaybi kooxda, taasoo keentay in kooxda laga badan yahay aanay si dhab ugu hoggaansamin go'aanka.

Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

**Go'aan is-qancin ku yimid**

In kasta oo habkani qaato waqti dheer, waa siyaabaha ugu wax-ku-oolsan marka go'aan la qaadanaayo, sababta oo ah wuxuu dhisaa u heelanaanta hirgelinta go'aanka. Go'aaminta lagu gaadho habka is-qancintu ma aha mid ku cusub hogaamiyeyaasha bulshada.

Run ahaantii qaar ka mid ah kuwiinnan wax akhriyaya, ayaa laga yaabaa in ay leeyihiin "maxaa ka macne ah". Bulshadayayda habkan qarniyo badan ayay adeegsan jireen.

"Qarnigii 17naad, markay dad reer Yurub ah tageen waqooyiga Maraykana, waxay la kulmeen qabiikl ka mid ah Hindida halkaas degannayd. Waxay la fajaceen qiyamkooda siyaasadeed. Bulshadaas kulama kulmin wax sansaan hogaamin ama xukun ah. Hindidaasi waxay lahaayeen aragti awoodeed oo ka duwan tii waagaa ka jirtay Yurub. Waxay adeegsan jireen hab raacyo kale oo uu ka mid yahay is-qancintu. Habka dhisidda is-qancintu iyo fududaynta hogoaminta lagu maareeyo nolosha bulshada.

Is-qancintu waa hab raaca warku uu ka mid yahay mid bannaan yaal oo taageera in qof kasta dareemo in uu fursad u leeyahay wax ku darsashada go'aan qaadashada.

Waxa isla markaas jira aaraa kala duwan oo arrintan ku saabsan, laaakinn kala duwanaanshaha ra'yi lama mooga. Horena waa loo dhegeystay, isla markaas dadka qabaa waxay diyaar u yihiin inay taageeraan go'aankaas.

**Go'aan lagu gaadho is-qancin buuxda**

Xaaladdani waxay tahay mid qof waliba uu ku qanacsan yahay habka loo hirgelinaayo arrin.

**Milicsi:**

In yar hako oo naqtiin siyaabaha kala duwan ee kooxi go'aan u gaadho. Ma xasuusan kartaa mar golihinu adeegadsaday habkan? Haddii ay jawaabtu haa tahay, ka warran raad-reebkeedii. Haddii ay kala soo gudboonaato in aad arrintii lafteedii mar kale go'aamiso, ma kula tahay in aad u go'aamiso, ma kula tahay in aad u go'aamin lahayd si sidii hore ka duwan?

Blank writing area with horizontal lines.

Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

## **Ka-feejignaan:**

Kooxda go'aan qaatayaasha ahi, marar qaarkood ayay halis u yihiin in ay ku dhacaan wax loogu yeedho "fikir-kooxeed". Fikir-kooxeed waa nidaamka fekerka ay xubnaha koox isku duubanna adegsadaan marka ay isu-soo-jiidistu ma huraan noqoto.

Goleyaasha degaan ku mararka qaarkood ayay ku dhacaan dabinka "feker-kooxeedka", markay bilaabaan in ay xoogga saaraan isku-xidhnaanta kooxda, taasi oo ay ku baylihiyaan fikir xor ah. Tusaalayaasha soo socdaa waa astaamaha "feker-kooxd", sida ka muuqan karta Golahiina oo kale.

Marka hore adiga iyo xubnaha Golaha markay la soo gudboonaato go'aamini, waxaad u debeddaan in aad doodda ku soo koobtaan mid ama laba siyood, idinka oo baadhin inta doorasho ee suurtoogel ah ama idiin bannaan.

Mar labaadka; dhif iyo naadir ayaad isku daydaan in aad dib-u-eegtaan go'aan ay gaadheen intiinna badani, xataa mar la codeeyo in go'aan uu leeyahay khataro iyo dhaliilo aan hore loo ogeyn.

Mar saddexaad: Goluhu kama raadsado talada shaqalaha ama khabiir idiin siin kara war xun oo ku saabsan faa'iidada iyo khasaaraha ka soo if bixi karta go'aannadiina.

Mar afraadka, xubnaha Gole waxay xiiseyaan xoogga iyo aaraa'da taageeraysa wixii ay go'aamiyaan kuwa ka soo hor-jeedana way iska indha tiraan.

Nin la yidhaahdo Jerry Harvey, oo ah xeeldheere cilmi nafsiga ah oo ku takhasusay dabeecadaha hay'aduhu (shirkadaha, ururaada, iwm) ayaa inaga siinaya fikir kooxeed muuqaal ka kor ku sharraxan.

Harvey wuxuu rumaysan yahay in dadka gaashaan-buurta, sida Golayasha

deegaan, inay inta badan u janjeedhaan in ay isu gaashaan-buuraystaan qaataan go'aammo aannu midkoodna raacsanayn. Muddo ka dib ayaa waxa ka soo baxay natiijooyinka aanay mahadin.

Argtida Harvey marka la eego, sidani waxay ku dhici karaan adigoo xildhibaan ah markaad:

- € ay ku timaada xaalad shaki ay kaaga muuqato, laakiin xildhibaanada kale ay taageersan yihiin.
- € Aad adeegsato u qaadashooyin dhaliil leh si aad u raali geliso ama taageerid xildhibaanada danaynaya go'aaminta, si aad uga nabad geshid cambaarayn inaana ahayn Jaalle, halka aad ka muujin lahayd fekerkaaga saxa ah.

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**





### **Dabinnada go'aaminta ee kale:**

Buug beri dhoweyd soo baxay oo la yidhaahdo "DABINNADA GO'AAMINTA", ayaa soo ban-dhigay toban wax oo carqalad ku ah go'aaminta wanaagsan. Waa wax tar in aad tobankan ku qortid xasuus-qorakaaga Golaha, si aad u tixraacdid markaad u baahatid. Sidaas waxa ku taliyey qoraaga buugga kor ku qoran:-

1. Is-maqiiqid: Waa marka aad bilowdo go'aaminta adiga oon hor uga fekerin waxaad samaynayso ama natiijadu waxay noqon karto.
2. Wax isku qufulid indho la': Markaad maskaxdaada ku qufusho dhalanteed kuu kexeeaya dhinaca qaladka ah, taasoo u geyeysiisa in aad furdaamiso dhibtaada qalad ah, ama in aad baal marto muuqda oo hagaysan.
3. La'aanta khariidad ku jihaysa: Adigoo dhibtaada ama xaaladda u qeexi kari weyda, siyaaba mid ka badan, ama ay si aad kuu saameeyaan aaraa'da doodayaasha kale.
4. Adiga oo si xad dhaaf ah ugu kalsoon garsooridaada: hillaadkaaga iyo aaraa'daada.
5. Toobiye arag-gaaban: rumaysiga warka aad sida ugu fudud u heli kartid, ama ugu fudud.
6. Farma-gaadho: go'aaminta aad u degdegsan ee aad fursad qofna u helin in la raaco hab-raaca cilmiyeysan ee go'aan qaadashada.
7. Wadhida kooxeed: waxayaalaha la mid ah "feker-kooxeed" iyo kalsooni ku qabka in kooxdu go'aan habboon gaadhi doonto.
8. Dhego ka fureysiga war-celinta: Sida maqal li'ida waxay dadka kale leeyihiin ama qalab-u-tarjumashada dhacdooyinka soo-jireenka ah maragooda.
9. Xusbad li'i: in aad ka gaabiso inaad tusmeyso ood gorfeyso natiijooyinkii ku soo maray si aad uga faa'iidayso.
10. Qiimayn la'aanta hab-raaca go'aamineed: marka aanad waqti ku qaadan in aad si cad uga hadasho sida aad go'aan ku qaadanayo, iyo in aad taabatay guul aad ka doonaysid hab-raaca.

**Laba faras isku mar ha fuulin, haddii kale futo  
qarrar ayaa kugu dhacaaya  
Maahmaah Soomaaliyeed**

### **Go'aan-qaadashada habsiino la'aaneed:**

Golayaashu badiba waxa laga doonaya inay go'aamo gaadhaan iyada xaaladuhu murugsan yihiin, iyo iyada oo ay maqan tahay xogtii iyo wararkii lagu salayn lahaa.

Dhibaato ama xaalada ay ku hareeraysan tahay faham la'aani markiiba waxa Goalaha u fududaataa in ay iska-leexiso. Inkastoo dhaqanka sidaas ah, ay bulshadu canbaarayso, ma aha mid xilkas darro ku timi, ee aadamuhu ayay

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

dabecaddiisa tahay inay iska-leexiyaan arrimaha aanay isu diyaarin guul ka gaadhidooda. Heerka ku xiga go'aan gaadhista adiga oon waxba go'aamin waa dib-u-dhigidda. Tani waa jawaab-celin caam u xaaladaha murugsan. Dib-u-dhigiddu, sida isk-leexinta waa caadi, marar qaarkoodna habboon sida xaladuhu muqdi yihiin.

Bulshadu dib-u-dhigashada go'aamin sida iska-leexinteeda waxay u fasiran karaan dhalliil ay leeyihiin Golayaashu.

Tan wax ka xigta tabta inta badan adeegasada marka ay Golayashu soo food saaraan hubinti li'i iyo mugdi. Taasi oo ah jawaab-celin kooban oo dareen tusaysa hase ahaatee u guntasho.

Tabtani, oo lagu tilmaami karo "go'aan li'l go'aammo" waa kuwa la doorbida ama wanaaguba ku jira. Markay xaaladdu cakiran tahay. Teeda kale waxay u muuqan karaan mawqifyo si dhib yar loo adegsado xataa marka aanay xaaladdu cakirnayn. Marka tani dhacdo, waad iska casishay xilkaagii hogaamineed.

**Inta aynu ka tashanayno hadmaynu bilawnaa, ayay  
saacaddu inaga dhacdaa.  
Maahmaah Laatiin ah**

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Qodobbo muhiim ah:**

- € Go'aaminta intaan waxba la go'aamini waa arrin dhibteeda leh.
- € Go'aan-qaadashada maan-galka ahi waa hab-raac lama huraan ah, mase aha sheekadii oo dhan marka ay timaaddo go'aan qaadasho.
- € Caddaynta dhibtaadu waxay noqon kartaa tan u adag una mudan marka go'aaminta iyo furdaaminta dhibaato. Haddaba la hadal dhibtaada.
- € Wakhtigaaga iyo tamartaa ha ku dhammayn furdaaminta dhibaatooyinka. Ka naso waqti aad ka faa'iidaysto fursadaha.
- € Ogaalka iyo higsadku waa tallaabooyinka u horeeya ee lagama-marmaan u ah go'aaminta.
- € Tayada iyo aqbalaaddu waa furaha qiimaynta go'aannad aad qarka u saaran tahay inaad qaadato.
- € Haddii kuwa dhibaataada qaybta ka ah, aan lagala tashan go'aanka in arrinta wax laga qabto, wax dhici karta in aanay taageeri doonin xalkeeda.
- € Go'aan qaadashada kooxeed dhawr siyood ayay noqotaa. Midina ma qaldana, laakiin qaar baa kuwa kale ka wanaagsan, inkasta oo ay tani ku xidahn tahay 'Go'aaminta waxay ku saabsan tahay'.
- € "Feker kooxed" waa "fayris" curyaamin karta awoodda go'aamineed ee Golahaaga.
- € Maareynta heshiisiisnta kooxi way ka adag tahay maareeynta is-qabad.
- € Waxa jirta go'aammo aan go'aan lahayn, kuwaas oo faai"do leh marka ay ku soo-food-saaraan xaalado cakiran iyo hubin la'aani.

**Raad-raac**

1. The Ernest and Young Quality Improvement consulting Group. Total Quality (Homewood, IL, Irwin, 1990), p.4.
2. Schein, Edgar H., Process Consultation, Vol. I (Reading, MA., Addison Wesley, 1988), pp. 69-74.
3. Harvey, Jerry, The Abilence Paradox and Other Meditations on Management (Lexington, MA, D.C. Heath, 1988), pp. 15-17.
4. Russo, J. Edward and Schoemaker, Paul J. H., Decision Traps (New York, Simon and Schuster, 1990), pp. xvi-xvii.

## **Qaybta: 2aad**

### **Aqoon-is-weydaarsi**

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Dulucda:**

Wax-qabadka madaxda la doorto waxa lagu qiimeeyaa go'aanada ay qaataan. Go'aannada wanaagsan micnahoodu wuxuu noqon karaa wax qabadka dawladda oo hore-u-mara iyo sumcada dawladda maxaliga ah iyo kuwo xukumo oo noqda mid togan.

Aqoon isweydaarsigan waxa loo hindisay inuu ka-qayb-galayaasha siiyo fahamka habraac go'aan-qaadasho iyo inuu baadi-goobo dariiqooyin kale oo loo adeegsado masuuliyada go'aan-qaadasho. Xildhibaanada dhameysta aqoon-is-weydaarsiga waxay awood u yeelan doonaan inay tilmaamaan carqaladaha hortaagan go'aan-qaadashada golaha, iyo inuu qorsheeyo oo fuliyo istraatiijooyin uu kaga baydho ama uu meesha ka saro carqaldahaas.

**Tusmada:**

Tilmaan kooban oo ku saabsan hawl kasta oo barasho ayaa hoos ku tusan iyadoo uu raacsan yahay waqtiga ay mid waliba u baahan tahay. Hadaad doonto siday u kala horeeyaan waad beddeli kartaa, wax baad ku tuuri kartaa, waxaad kale oo ku dari kartaa agab tababar oo adigu aad aqoonteeda leedahay; xor baad u tahay inaad sidaas sameyso.

**3.1. Layli diyaar-garow:**

Qof kasta oo ka mid ah ka qayb galayaasha wuxuu dooran karaa shanta nooc ee go'aan-qaadasho kuwa uu door bidayo si ay ugu fududayso kaalintiisa xildhibaan. ---Xuma iyo wanaagga ay mid kasta oo uu doorbidayo ayaa lagaga doodi doonaa kal-fadhi loo dhan yahay.(45 daqiiqo)

**3.2. Bandhigga tababaraha:**

Bandhig kooban oo ku saabsan go'aan-qaadashada golaha. Adeegso agabka maqaalka si aad u ogaato sida go'aan loo qaato, talaabooyinka habraaciisa, carqaladaha go'aan-qaadasho, iyo sida xubnaha goluhu u noqon lahaayeen go'aan qaate wax-ku-ool ah. (30 daqiiqo)

**3.3. Layli: Go'aammada san iyo kuwa xun:**

Ka-qayb-galayaasha oo ah kooxo shan shan ama todoba todoba ayaa la weydiin doonaa inay taxaan astaamaha golaha go'aanno wanaagsan iyo kan go'aano xun qaata. Dhiirigeli ka-qayb-galayaasha inay uga fekeraan si hal abuurimo leh siyaabaha loo tayeyn karo waxqabadka go'aan-qaadashada ee golaha (120 daqiiqo).

**Xildhibaanaka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**3.4. Jilid: Go'aan-qaadasho:**

Ka-qayb-galayaasha ayaa xubino ka noqonaya go'aan-qaadasho la metalayo oo ku saabsan kal-fadhi miisaaniyadeed, halkaas oo ay dhowr kooxood oo muwaadiniin ahi u beritamayaan deeg lacageed oo xaddigeedu badan yahay oo uu goluhu dhowaan helay. Waqti sii saddex bandhig, xeer goynta golaha, iyo ka doodida natiijada go'aanka. (120 daqiiqo).

**3.5. Diraasad xaaladeed: Xarunta dhexe ee Basaska ee Xanfaley**

Iyaga oo kooxo shan ilaa 7 xubnood ah ayey ka-qayb-galayaashu akhrisan doonaan xaalad ay ku jirto dhibato uu gole la kulmi karo. Koox kasta waxa la weydiin doonaa inuu xaaladda akhristo, go'aan ka gaadho, ayna ka jawaabaan su'aalo ku saabsan habraaca ay u adeegsadeen go'aan gaadhis. Goob-jooge ayaa koox kasta loo cayimaa si uu qiimeeyo habraaca ay koox kastaa dhab ahaan adeegsatay. (60 daqiiqo)

**3.6. Layli: Gudbin xirfadeed:**

Ka-qayb-gale kasta ayaa si gaar ah ugu fekeriisa, kadibna fekerkiisa la wadaagga kuwa kale wuxuu damacsam yahay inuu sameynayo aqoon isweydaarsiga ka dib iyo waxuu ka barten aqoon-isweydaarsiga go'aan-qaadshada. Ku dhiirgale ka-go'naanta qof ahaaneed ee isbeddel yimaada. (45 daqiiqo)

Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

### 3.1: Layli diyaar-garow: Liiska hubineed ee Go'aan-doorashada

**Waqtiga:45 daqiiqo:**

**Ujeedo:**

Layligani waa dariiqo ay ka-qayb-galayaasha aqoon-is-weydaarsigu u asteen karaan shanta siyood ee go'aan-qaadasho ee caamka ah, kuwa ay la tahay inay inta badan u adeegsan karaan kaalintooda xildhibaan. Sida ku cad liiska hubinta, hababku waxay leeyhiin muunado kala duwan (go'aan go'aan li'l) iyo fal-celin degdeg ah (diyaar, liishaan, rid)

Ka qaybgalayaashu ha dhameeyaan layliga intaanay soo qadimin go'aan-qaadasho xanbaarsan xog fikradeed. Tani waa lama huraan. Faa'idada layligu waa in la helo sawirka saxa ah ee ay ka-qayb-galayaashu isu arkaan inay u dhaqmayaan, ee aan ahayn siday u malaynayaan inay u dhaqmayaan.

**Hab-raac:**

Ka codso ka-qayb-galayaasha inay dhameeyaan kala doorashada liiska hubinta go'aan iyadoo qof waliba keligii shaqaynayo. Sii 15 daqiiqo oo ay ku dhameeyaan hawsha. U sharax inaanay jirin doorasho wanaagsan iyo mid xumi toona, iyo inay mid kastoo ka mid ah shantu ay noqon karto jawaab celin ku haboon dhibaato ama fursad gaar ah.

Ka-qayb-galayaasha doortayna ay gacanta taagayaan. Natiijooyinka ku qor waraaqo.

markay ka-qayb-galayaashu dhameeyaan liiska hubinta, ku dhawaaq cugasho kasta ka-qayb-galayaasha ka codso inay gacanta u taagaan tay u cugteen inay tahay doorashada ay inta badan adeegsadaan natiijooyinka ku qor warqad weyn.

Adigoo su'aalo ka weydiinaya xaaladda doorasho go'aan qaadasho loo adeegsan karo bilaw dood. Ka codso ka-qayb-galayaasha inay tusaale waayo-aragimada ka bixiyaan goluhooda siiba kuwa ku qoaran waraaqaha waaweyn. Ka dhig hab-raaca mid xawli ku socda si waqtiga loo ilaaliyo.

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**



Weedhaha soo socdaa waxay tilmaamayaan lix nooc oo kala doorashada go'aan qaadasho oo ay adeegsadaan xildhibaannada adduunka oo dhami. Akhri lixda doorasho. Tilmaan ta aad badiyaaba u adeegsato kaalintaada xildhibaan. Taad doorato sanduuqa horteeda ku yaal ku dhig calaamada.

- Waxaan ahay qof samir badan. Waxaan sugaa waayo, dhibaatooyinka intooda badani iyagaa ayaa is xalila go'aan qaadasho la'aan.
- Markiiba waxaan sameeyaa. Badiba go'aanka aan qaato waa ka haboon
- Waxaan helaa xogta ugu badan ee dhibaataada iyo sababaha dhaliyey, ka hor inta aannan waxba sameyn
- Si qoto dheer ayaan xildhibaanada ugala doodaa, in loo baahan yahay go'aan iyo go'aanku waxa uu ku saabsan yahay.
- Waxa aan isku dayaa inuu qof kasta oo arrinta ku hawli iga raaco inta aanan waxba qaban.
- Waxa aan raacaa aqalabiyada ama kuwa aan ra'ayigoodu qadariyo.

Hoos ku qor tilmaamaha xaalad, adiga oo xildhibaan ah lagaa filayey inaad go'aan qaadato. Tilmaan go'aanka aad qaadatay iyo doorashada aad adeegsatay.

|       |
|-------|
| _____ |
| _____ |
| _____ |
| _____ |
| _____ |
| _____ |
| _____ |
| _____ |

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Aqoon-  
is-weydaarsi**

Natiijadu ma ku raali gelisay?  
Faahfaahi sidaad mar labad u gudageli doontaa (maxay noqon  
doontaa doorashadaadu go'aan)

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

### 3.2: Bandhigga Tababaraha

**Waqtiga: 30 daqiiqo**

**Ujeedo:**

Qadimaadani waa inay ka-qayb-galayaasha aaraa iyo muuqaalo ka siiso kaalinta go'aamiye iyo asaaska fikrada uu u adeegsado qof ahaan iyo koox ahaanba layliyada aqoon isweydaarsiga.

**Hab-raac:**

Diyaari qadimaada adiga oo ku salaynayo xogta aad ka kasbatay maqaalkii kan ka horey ee ahaa kaalinta go'aamiye. Xoogga saar sida go'aanno loo gaadho, talaabooyinka habraaca, carqaladaha ka horyimaadda go'aan qaadashada, iyo sida ay xildhibaannaddu u noqon lahaayeen go'aan qaatayaal wax-ku-ool ah.

Xogta oo aad ku qodobayso kaadh waxay kuu fududyan kartaa inaad si habaysan u gudbiso xogta waqtigii loogu talagalay. Weydii su'aalo muddo kadib inta aad wax qadimayso, si aad u hubiso ka-qayb-galayaashu inay kufahmeen iyo inay kuu soo jeedaan. Ku taageer qadimaada kalkaaliyaasha waxbarasho, oo aad ku qortay/sawirtay waraaqo waaweyn ama "overhead" projector.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

### 3.3: Layli: Go'ammada san iyo kuwa xun

**Waqtiga: 90 daqiiqo:**

**Ujeedo:**

Layligani wuxuu ku dhiirigelinayaa ka-qayb-galayaasha aqoon-isweydaarsiga inay dib-u-eegaan waayo-aragnimadoodii go'aan-qaadashadda Gole, iyo inay waayo-aragnimada la wadaagaan fadhi kooxeed. Waxa intaa u dheer oo siiyaa ka-qayb-galayaasha fursad ay si hal-abuur leh uga fekeraan siday uga bixi lahaayeen go'aan-qaadashada Gole ee liidata.

Caadiyan, layligan waxa la adeegsadaa, bandhigga iyo ka doodida go'aaminta Gole.

**Hab-raac:**

Layligan waxaad ku bilaabi kartaa adigoo yidhaahda "qof kasta oo waayo-aragnimo xildhibaan lihi wuxuu arkay Golaha oo go'aano wanaagsan iyo kuwo xunba qaatay. Hase ahaatee, markay doodi kulaato, kuwo ku hawlan go'aan ku dhif ayey waqti siiyaan inay dib-eegid feker leh ku sameeyaan go'aanka iyo habka lagu gaadhay.

Far waaweyn ku qor labadan su'aalood warqad weyn:-

1. waa maxay astaamaha Golayaasha qaata go'aanno wanaagsan?
2. waa maxay astaamaha Golayaasha qaata go'aanno xun?

U qaybi ka-qayb-galayaasha labo kooxood oo yar yar, isna le'eg. Su'aashaa hore laba kooxood midkood sii, tan kale kooxda kale sii.

Warqadda shaqo ee bogga kan ku xiga ku taalaa waxay ka-qayb-galayaasha u fududaynaysaa inay liisaska astaamaha oo ee mid walba u gaara sameeyaan. Koox kasta weydii inay ku qoraan liiska astaamaha warqad, iyadoo dhanna kuu keenaan (20-30 daqiiqo)

Markay labada kooxoodba dhameeyaan hawsha, kalfadhiga loo dhan yahay ha isugu yimaadaan, dabeedna weydii af-hayaha koox kasta inay war bixin 5 daqiiqo ka bixiyaan natiijooyinkii kooxda. U qoondee 5 daqiiqo oo dood ah, bandhiga ka dib.

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Markay labadii kooxoodba dhameeyaan hawshada, kulmi kooxaha oo dhan, kadibna weydii afhayeenka koox kasta inuu muddo shan qadiiqo ah uu ka warbixyo natiijooyinkii kooxdiiisa. Dhawr daqiiqadood u qoondee warabixin kasta si looga doodo.**

**Go'aammada san**

**Go'aammada xun**

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Iyaga oo liisaska astaamaha go'aanada wanaagsan iyo kuwa xunba ku dhejisan yihiin derbiga fasalka, warqad cusub ku qor su'aashan soo socota:

Maxaan qaban karaa si aan u hagaajiyo wax-qabadka go'aan-qaadashada Golaha aan ka mid ahay?

Weydii ka-qayb-galayaasha inay ka fekeraan siyaabo arrintan loo samayn karo, dabadeedna ay qoraan (eeg warqadda shaqada ee bogga soo socda) u soo jeedi in ka-qayb-galayaashu ay dib u-jaleecaan labada liis ee aaraada. Shan daqiiqo kadib ka ururi ka-qayb-galayaasha aaraada ay hagaajiyeen ku qor warqado cadcad. Haddii uu waqtigu ka saamaco dood geli natiijooyinka hawshan; diiradana saar dooda aaraadan kuwood ugu faa'iido badan iyo sida loo fulin karo.

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## Qoraalka Xildhibaan

Maxaan qaban karaa.....

---

---

---

---

---

Waa maxay waxaan Xildhibaanada kale ee Golaha ka bartay dhinaca go'aammada san iyo kuwa xun.

---

---

---

---

---

Xildhibaan  
G/Degaan  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

### 3.4 Jilid: Go'aan qoondayn

**Waqtiga: 120 daqiiqo**

**Ujeeddo:**

Layligani wuxuu siinayaa fursad ay ka-qayb-galayaashu wax kaga bartaan go'aan-qaadashada iyagoo ku dhex jira habraaca go'aan-qaadashada mataliddu waa kalkaaliye waxbarasho oo xooggan. Ka-qayb-galayaasha waxay matilaadu xaalad u eg tii runta ahayd, oo ay ka kasbaan dareemada nolosha runta. Iyagoo og inay matilaad keliya thay ayey ka-qayb-galayaashu ku dhiiradaan inay jilaan xaaladda nololeed oo dhab ah iyagoo adeegsanya dabeecaddu iyo farsamooyin. Matiladdu waxay la mid tahay adigoo riyoonaya, dareenkeeduna ma aha mid aad maskaxdaada ka saari karto, xataa markaad baraarugto.

**Hab-raac**

U qaybi ka-qayb-galayaasha afar kooxood oo yar yar, oo ay midi ka kooban tahay shan xubnood. Koox walba sii nuqul xaaladda iyo tilmaanta kaalintooda. Fiiro gaara: - Haddii ay suurtagal tahay, aqoon-isweydaarsiga ka hore sii kooxaha qoraalka xaaladda hoos ku faahfaahsan; si ay u ogaadaan xaaladda iyo kaalmahooda.

Adiga ayaa kala dooranaya inaad ka-qayb-galayaal matala kaalinta xubnaha Golaha magacaabatid iyo inaad weydiiso mutadawaciin. Si kasta ha ahaatee waa in la helaa ka-qayb-galayaal metila Guddoomiyaha Golaha iyo afarta kale ee xildhibaan kaalintooda. Magacyo aad dooratay ayaa xubin kasta oo Gole ahi siin kartaa ama jilayaasha ayaad ka codsan kartaa inay isticmaalaan magacyadooda.

Inta ka-qayb-galayaasha hadhay u qaybi kooxaha 1, 2, ama 3. saddexdaa kooxood mid kasta ka xulo qof goob-jooqe ah. Kadib marka ka-qayb-galayaasha mid kasta la siiyey kaalin/door, ka codso xubnaha saddexda kooxood inay tagaan qolal loo qoondeeyey, si ay u soo dejiyaan qorshe hawleed ay Golaha kaga iibiyaan soo jeedintooda.

U sheeg in waqti ay hawsha ku soo dhamaynayaan ay thay 45 daqiiqo. Koox waliba ha cugato qofka kooxdooda af-hayeen u noqon lahaa. U sharax in golaha oo hawlo badan haya awgeed; koox kastaa la siinay 0 5 daqiiqo oo kaliye inay ku dhamaysto bandhigeeda.

Inta ay saddexda kooxood doodayaan, kooxda matilaysa goluhu, kuraasta iyo miisaska yaala qolka tababar ha u diyaariso si la mid qolka gole deegaan. (habka kuraasta iyo miisaska loo dhigayo waa ta ku sawiran buugga kan ku xigga)

Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto




Xubnaha Golaha oo fadhiya, ayay koox waliba bandhigeeda soo jeedinaysaa. Saddexda goob-jooge iyo kooxaha bandhigga samaynaya mooyee cid kale looma ogala qolka golaha. Haddii ayntu si kale u dhigno kooxina ma dhegeysan karto soo bandhiggidda, siiba kooxaha aan weli soo bandhigani. Bandhigyada ka dib ayaa xubnaha Goluhu ka doodayaan iyadoo ay good-joogayaashu dhegeysanayaan, eegayaan, oo ay waxay la tahay qorayaan.

15 daqiiqo kadib codso in go'aan la gaadhay iyo in kale. Goob-joogayaasha ka codso inay warbixin ku siiyaan, xildhibaannada iyo guddoomiyayaasha kooxuhuna ay ku siiyaan aragtidooda.

Dooda ka dhalata hawlaha kor ku xusan, bartilmaameed uga dhiga habraaca uu adeegsaday goluhu si uu u gaadho go'aan iyo wax-ku-oolnimadiisa

### Muuqaalka Qolka



Xildhibaanadu waxay ku fadhiyaan xagga hore kuraasta miiska dheer ka dambaysa. Miiska yar ee dhexda yaal mawaadiniinta qofkii doona inuu hadlo ayaa adeegsanaya. Afar-geesyada waxa fadhiisanaya muwaadiniinta wax soo bandhigaysa.

Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

## GO'AAN-QOONDAYNTA

### **Xaaladda**

Maal-qabeen ganacsade ah oo magaalada San Pedro degganaa ayaa geeriyooday, kana tegay lacag aad u badan. Lacagtu waxay dhameyd US\$150,000 oo uu dardaarmay golaha magaaladda lagu siin doono shan jeer oo min US\$10,000 ah. Dardaaranka waxa ka mid ahayd shuruud odhanaysa lacagta waxa loo isticmaali karaa qadiyada dan guud ah oo u qalanta, uu-se go'aankeeda leeyahay golaha magaaladdu. Hase ahaatee hadduu golaha ku guuldaraysto inuu bixiyo ama uu go'aankiisu ka dib-dhaco kalfadhigga kan lagu qoondeynayo ku xigga deeqda waa lgala noqon doonaa iyada oo ka noqosho lahayn.

Saddex kooxood oo beesha ka mid ah ayaa caddeeyey in ay doonayaan inay lacagtaas soo -jeedinno usoo qoranayaan. Hawsha golaha hor-taalaa waa inay saddex soo-jeedinood dhegeystaan, kadibna one ka mid ah kooxaha beesha doortaan inay tahay ta ku guuleysatay.

### **Sifaalaha magaalada San Pedro:**

San Pedro waa magaalo ganacsi oo ku taal dal soo koraya. Dawladda dhexe ayaa ku hawlan qorshe daadejin xukunka, kaasoo saameyn doona dawladda maxaliga ah ee San Pedro. Magaaladda waxa xukuma gole magaalo oo shan xubnood ka kooban, oo uu mid waliba wakiil ka yahay degmo gaar ah. Xildhibaanadda waxa loo doortay muddo laba sano ah, markay helaan aqlabiyad hal dheeri ah, codadka laga dhiibtay degmooyinkooda.

### **Doorarka Xildhibaanada:**

**Guddoomiyaha Golaha.** Waxaad tahay Guddoomiyaha Golaha oo laga soo doortay San Pedro degmooyinkeeda wershadaha lahayn. Waxay kuugu codeeyey xildhibaanadda saaxiibadaa ah. Cod dhan 4 ka mid 5ta xildhibaan ee golaha. Waxaad tahay nin si balaadhan loo tixgeliyo xirfadaha iyo kartida hogaamitiisa; oo ay ka mid yihiin inaad muslax ka dhaliyo kooxaha ku dagaalama golahaagga.

Maanta arrinta golaha hortaal waa inuu go'aamiyo saddex kooxood ee beesha ta ay tahay inay hesho lacagta uu maal-qabeenku siiyey beesha. Waxad qorsheysay in hogaamiyaha koox beel kastaa uu soo qadimo kooxdu waxay ku salaynayso inay hesho lacagta. Ka dibna uu goluhu ka doodo soo jeedinuhu siday u kala mudan yihiin. Muraadkaagu waa inaad hubisaa in:

**Xildhibaanada  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

1. Aan lacagtaas la waayin, iyada oo ay sabab u tahay Golaha oo go'aan gaadhi kari waayay,
2. Go'aan lagu wada qanacsan yahay lagu qaato in sida ugu habboon lacagtaas looga faa'iidaysto,
3. La dhowro sumcadda Golaha oo ah in uu yahay mid maan-gal ah, dhowrsoon oo ku werwera danaha ay wadaagaan mujtamaca oo dhami,

**Laba Xildhibaan oo xagga ganacsiga u janjeedha:** San Pedro waa magaalo midhaha ridiqa. Dhaqaalaha magaaladu wuxuu inta badan ku tiirsan yahay weshadeynta tacabka beeraha. Xildhibaan ahaan waxay wadaagaan dan. Labaduba waxay wakiilo u yihiin degmooyin hoy u ah shaqaalaha weshadaha. Dadka idin soo doorta, shaqo ma hayaan, taasoo ay sababtay markii dhowaan ay xidhmeen wershadda xigga oo ahayd shaqo-bixiyaha magaalada u weyn doortayaashiinu waxay si toos ah uga faa'iidayaan karaan xarun tababaro xirfadeed, taas oo ay saddexda kooxood mid ka mi d ahi u soo-jeedinayso inay tahay ta u qalanta in laga maalgeliyo lacagta uu maal qabeenka uu ku deeqay.

**Laba Xildhibaan oo tageera adeegyada bulshada:** Dhibaatooyinka magaalada haystaa dhamaantood ma aha kuwa dhaqaale xumo. Dabeecada magaaladda San Pedro ayey ka dhasheen dhibaatooyin bulsho oo badani. Waxyaalaha ka dhashay shaqo li-ida ayaa waxa ka mida inay raga shaqada li;I ay u safraan magaalooyin ka rajo wanaagsan, iyadoo xaasaskoodii iyo caruurtoodii yar-yareyd kaga tegaya magaaladda. Iyada oo aanay jirin adeegyo caafimaad oo habooni, beeshu waxay halis u tahay cudurka cabsidda leh ee AIDS Virus-ka. Xildhibaan ahaan, labadiinuba, waxaad muddo dheer doodayseen qadiyadda dadka tabaalaysan ee reer San Pedro. Waxa **Rekoodhkii** ka qoran inaad taageertaan sidii maalgelin loogu daryeelo caafimaad iyo baahiyaha kale ee carruurta degaanka ah. Waxaad damacsan tihiin inaad taageertaan xarunta xanaanada carruurta ama barnaamijka caafimaadka hadba ta loo soo bandhigo golaha si qancis leh.

#### **Doorarka Kooxaha Bulshada:**

**Kooxda 1aad:** waxaad wakiil ka tihiin shirka/kambani gaar ah, oo ay dhisidiisa ka dambeeyeen ganacsatada degaanka, si ay magaalada ugu hayaan xoogsatada iyadoo shaqo loogu abuurayo. Shirkadu waxay ka heshay dhul ay siisay wershed ka mid ah kuwa magaaladda waxay hadda u baahan tahay maalgelin ay ku hawl geliso xarun tababarka xirfadaha. Waxaad werwer ka qabtaan camal li'ida sii kordhaysa. Waxaad aaminsan tihiin in shirkaddu ay si weyn u yaraynayso shaqo li'ida. Waxadse u baahan tihiin ilo dhaqaale oo maalgeliya hawlihiina dib-u-shaqaalayn dadka aan shaqo hayn.

**Kooxda 2aad:** waxaas tihiin koox u dooda, taageero xooggan siisa goobaha aan wershadu aan ka dhisnayn ee San Pedro. Waxa idin taageera kooxaha

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Daryeelka caafimaadka iyo kooxaha dhakhtarrada degaammada, waxaad raadinaysaan maal-gelin lagaga hawl galo barnaamajyada cusub ee ka-hor-tagga faafidda cudurrada, gaar ahaan AIDS-ka; idinka oo adeegsanaya waxbarasho wax ka tarta cudurrada faafa. Waxa kale oo aad rumaysan tihiin in kooxdiiinu ay xaq u leedahay lacagta uu Golaha magaalada siiyay marxuumkii maal-qabeenka ahaa; sababta oo ah dhibaatooyinka caafimaad ee baahida degdegga ah ee uu mujtamacu qabo.

**Kooxda 3aad:** waxaad tihiin koox wadaado ah masaajid ka socota. Waxaad taageero buuxda ka heshaan culimada diinta ee beesha iyo dugsiyada dawladda. Kooxdiiina waa kooxda ugu mudan ee adeegyo u fidisa danyarta beesha, iyadoo aan faa'iido doon ahayn kuna tirsan maalgelin dibadeed. Waxaad maalgelin dibadeed u doonaysaan in aad furto xanaano carruureed oo ku taal meel ay degan yihiin dad sabool ah. Xaruntu waxay faa'iido u tahay waalidka shaqeeya ee carruur aad u yar yar leh. Xaruntu waxay daryeeli doontaa carruurta waqtiga ay waalidkood shaqo ka maqan yihiin.

Maa daama ay waalidka kaliya ee madaxda qoyska ah yihiin. Haddii aannu waalidku shaqayn, ma quudin karaan carruurtooda. Hase ahaatee waalidku ma awoodi karo inay qof guriga ka adeega oo carruurtana sii xanaaneeya inta ay waalidku shaqo ku maqan yahay. Waxaad u aragtaan xarunta xanaanadda carruurta ay xal u tahay baahida raagtay ee beesha.

Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

**Xaashi-hawleedka Kormeeraha**

1. Goluhu ma Go'aamiyaa?

HAA  MAYA

2. Hadday "maya" tahay, maxay u go'aamin waayeen?

---

3. Hadday "haa" tahay, side loo go'aamiyaa?

Go'aanku kamay jawaabin aaraada looso jeediyey?

Go'aanka gaadhay guddomiyaha isagoo ka wakiil ah golaha.

Go'aanka waxa gaadahay 2 ama 3 ka mid ah dadka golaha ugu firfircoon.

Go'aanka waa lagu gaadhay hal-dheeri.

Go'aanka waxa lagu gaadhay is qancin ah in la taageero hawlgal gaar ah

Go'aanka waxa lagu gaadhay isqancin loodhan yahay.

4. Markii go'aanka la gadhayey xildhibaanaddu Af-macaan ma iskula xidhiidhayeen si ay meesha uga saaraan fekerka dhabta ah?

HAA  MAYA

**Ku sharax jawaabtaada hoose:**

---

---

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

### 3.5 Daraasad: La dagaalanka Musuq-maasuqa

**Wakhti:** 90 Daqiiqadood

#### **HADAF**

Layligan waxaa loogu talagalay in ka qayb galayaashu fahmaan Siyaabaha ka la duwan ee loola dagaalami karo musuq maasuqa iyo baahida waxbarasho ee ay u yeelanayaan ereyga SMART oo ah xarfo la soo gaabiyey oo ujeeddooyinkoodu yihiin in hadafku ahaado mid, fudud, la qiyaasi karo, la yeeli (caqbali) karo, run ah, wakhti go’anna leh. Fahanka ereygani wuxuu u soo gelinayaa ka qaybgalayaasha inay ogaadaan sida wanaagsan ee hadafkoodii qorsheysnaa ay ugu guuleysteen. Intaa waxa dheer in ay ka qayb galayaashu kor u qaadayaan aqoontooda iyo xirfadda ay ku dabagalayaan hadafkoodda qorsheysan iyagoo dajiyey cabbir ay sii go’aansadeen, kaasoo marka la qiyaaso ama la barbardhigo hawl fulintooda sheegaya in dariiqii hadafka lagu gaadhayey laga leexday iyo in kale. haddii weecasho ama leexasho jirto, waxaa la qaadi talaabo lagu saxo ama lagu toosiyo weecashada.

#### **HAWL-SOCOD**

Ku bilow layliga u qaybinta nuqulka “La Dagaalanka Musuqa” ka qayb galaayasha oo dhan, kuna waani in ay si deggen u akhriyaan una fahmaan dhibaataada musuq-maasuqa. Ka qayb galayaasha u qaybi afar kooxood. Koox kastaana in ay goonideeda uga wada hadlaan ugana jawaabaan su’aalaha la socda daraasadda muddo 60 daqiiqadood ah. Marka ay koox kastaaba dhammeeyaan jawaabaha su’aalaha dib ha isugu soo biiraan oo koox walba jawaabaha ha ku qorto warqadaha waaweyn (flip charts). Ka dib u fur oo hogaami ka qayb galayaashu in ay isku qiyaasaan jawaabahoodao. Dooduhuna waa in ay ku saleysnaadaan maangal.

Haddii ay xubno ka tirsan ka qayb-galayaashu ay soo jeediyaan fikrado ka madax bannaan kuwa kooxaha oo habboon waa in la tixgeliyaa.

#### ***DIRAASAD XAALADEED***

Musuq-maasuqu waa dhibaato xun oo daciifisa awooda masuuliyadda hay’adaha Dawliga ah.

Magaalo ka mid ah magaaloyinka ku yaalla Qaarada Arcifa ayaa waxay ku caan baxday Musuq-maasuqa oo gaadhey heer aad u xun. Saraakiisha xafiiska dakhligu waxay caadeysteen in ay qaataan laaluush iyagoo hoos u dhiga cashuurta alaabta debedda laga soo dejiyo intii sharci ahaan lagu cashuuri lahaa in aad uga yar. Saraakiishu waxay carqalad geliyeen cashuur bixiyaha oo mararka qaarkood aanay ku waajibin cashuur bixini. Waxay samaysteen shaambado iyo warqadaha yar-yar ee lagu dhejiyo alaabada. Laaluush qaadashada iyo eexdu waxay qaloocisey go’aan qaadashada shaqaaleynta, bedelka shaqaalaha iyo magacaabidaba. Ujeedooyinkii shuruucda iyo nidaamkii maamulka waa la iska dayacay. Hanti-dhawrkii Gudaha ee la rabey in uu talaabo sharciga waafaqsan ka qaado

**Xildhibaanka  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go’aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

baadhitaanka uu sameeyo, wuxuu ogolaaday in uu laaluush ka qaato kuwii uu baadhayey.

Hadaba, markii uu musuq-maasuqi ku fiday dhammaan hawl-wadeennaddii dhaqaalaha ee magaalada ayuu xubnihii Golaha Deegaanku bilaabay wada tashi sidii looga hortagi lahaa loolana dagaalami lahaa musuq-maasuqa. Golaha Deegaanku waxay ka walaaceen ujeeddooyinka ay qorsheeyeen kaligood in uu ku filan yahay oo u keeni karo natiijo lagaga wada guuleysan karo musuq maasaqa. Haseyeeshee, xildhibaano ka mid ah golaha ayaa soo jeediyey in shirka lagu casuumo xubno ka tirsan Maxkamadaha, Hay'adda shaqaalaha, Hanti dhawrka qaranka iyo cidii kale ee wax ka qaban karta. Ujeddooyinka go'aanadooduna u noqdo kuwo la gaadhi karo. Arrintan dhammaan Golihii Degaanku si buuxda ayuu isugu raacay. Golihii Degaan oo ay weheliyaan xubno ka socda Hay'adihii la casuumay ayaa shirar iyo wada tashi badan ooy ka yeesheen sidii loo qorsheyn lahaa istiraatiijiyad lagu tiraayo musuqa.

Muddo ku dhow saddex bilood ka dib ayey aasaaseen guddi ka kooban laba xubnood oo Golaha ka tirsan, laba xubnood oo Maxkamadda Sare ah, laba xubnood oo Hay'ada shaqaalaha ka socda iyo laba xubnood oo Hanti dhawrka qaranka ah.

Guddigu waxa loo xil saarey ujeeddooyin ka kooban lix qodob oo sidan hoos ku xusan ah:-

1. In la cabiro dakhliga la lunsaday muddooyinkii ugu dambeeyay.
2. In loo kuur galo cabashada dadka.
3. In xirfadaha iyo kartida shaqaalaha xafiiska lagu sifeeyo xagga ka maqnaashaha shaqada, habsanka, inta jeer ee cadaalad xumo laga dacwoodey, iyo tababar.
4. In la sharaxo ujeeddooyinka la xidhiidha isbadalada dhismaha maamul xafiiseedka iyo shaqooyinka la xidhiidha, lana muujiyo dhismaha la rabo mustaqbalka.
5. In la tixraaco balanqaadka xafiiska ee khuseeya bulshada iyo iwm, oo lagu cabbiro xagga nooca shaqada, tirada maalmaha adeega, iyo dakhliga iyo kharashka.
6. In la soo bandhigo qodobo la raaco si looga ilaaliyo xafiiska shaqo-xumo maamul.
7. In la soo bandhigo xaalada ku habboon in loo qiimeeyo inta aan awooda xafiiska aan la furfurin (decentralization).

### **Su'aalo:**

1. Awooda la siiyey Guddiga ma ku filan tahay in ay dabagal ku sameeyaan?
2. Sidee loo sameeyaa dabagalka ujeeddooyinka qorsheysan?
3. Waa maxay caqabada is hortaagi karta cabbirka ujeeddooyinka qaarkood?
4. Waa maxay ujeeddooyinka ugu waaweyn ee Guddiga loo sameeyey?
5. Waa maxay faa'iidada ay leedahay dabagalku?

**Xildhibaan  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Go'aamiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

### 3.6: Diraasad Xaaladeed: Xarunta dhexe ee Basaska ee Xanfalay

**Waqtiga: 60 daqiiqo**

**Ujeeddo:**

Layligani waa inuu ka qayb-galayaasha siiyaa waayo-aragnimo infiidood dhibaato ay ujeeddo leedahay, iyadoo la tixgelinayo xalal kala duwan ee Xaaladaha kala duwan. Xaaladuhu waa wax ku dhaw uun runta oo siin kara ka qayb-galayaasha nolosha xaqiiqada oo ah dhadhan-keeda xagga go'aan qaadashada iyadoon lahayn qaad xilka iyo khataraha ay go'aamintu yeelan karto.

Ujeedada habka dirasad xaaladeed waa wax ku-barashada doodaha. Adigoo ah tababara ayaa doodad bilaabi kara ama hagi kara iyadoo aad ku dhirigelinaya ka-qayb-galayaasha inay codkooda dhiibtaan.

Garo xidhooda wax-la-dhiganayo waa muhiim. Dadka kale waxaad ku cawin kartaa inay si miyir leh u akhrido ka dibna ay ra'yigooda ka qaataan xaaladda.

Isu diaari inaad ka-qayb-galayaasha ka caawisid sida ay isu barbar-dhigi lahaayeen xaaladda iyo aqoona ku saabsan go'aan-qaadashada aynnu hore uga soo doonay.

**Hab-raac**

Ku bilow layliga adigoo siinaya ka-qaybgalayaal kasta koobi Xaaladda (Saldhiga dhexe ee basaska Xanfaley), ka dibna weydii inay akhristaan Xaaladda. Ka-qayb-galayaasha u qaybi saddex dood-kooxeed. Koox walba sii 40 daqiiqo oo ay kaga jawaabaan shanta su'aalood ee ku yaal dhamaadka Xaaladda.

Afartanka daqiiqo kulmi kooxaha fadhi loo dhan yahay, kana codso warbixin qoraal ah oo ku qoran waraaqo waa weyn. Hogaami dood isbarbar dhigeysa natiijooyinka kooxaha. Ku dedaal in doodu ay gaadho heerar sare, si loo liishaamo go'aan qaadashada xaaladda arrimaha salka u ah



## XARUNTA DHEXE EE BASASKA XANFALAY

Sanado badan ayey ahayd dhaqanka basleyda u adeegta magaaladda Xanfaley inay dareewaladoodu ku dhiirigeliyaan inay dadka markay dejiyaan, kuwa kalena ka qaadaan meel kastoo ka mid ah shaarica. Dhaqankani waxa uu si weyn faa'iido ugu ahaa dadka dukaanada wax ka iibsanaya iyo shaqaalaha xafiisyada ee ka soo raaca basaska tuulooyinka una socdaala magaalada Xanfaley.

Beri dhaweyd ayaa ganacsatada degaanku golaha magaalada gaadhsiiyeen cabasho dhinaca adeegga basaska. Ganacsatadu cabashadoodu waxay leedahay, inamada basaska ka shaqeeya oo qaylo badan, iyagoo u beretamaaya rakaabka basaska, tixgelin la'aanta halka ay ku daadinayaan ama ka qaadayaan rakaabka oo inta badan ah geftinada shaaricyada, taasoo abuurta sawaxan iyo buuq dheeraad ah, rakaabkaas la daadiyey oo hor wareega, kuna soo urura goobaha ganacsi hortooda.

Waxay ku andacoodeen dhaqankaasi in aanu u wanaagsanayn ganacsiga, sidaas darteed ay golaha ka doonayaan inay wax ka-qabtaan.

Iyagoo qadarinaya danaha ganacsatada; ayey xildhibaanadu tixgelinayaan soo jeedin goob badhtamaha magaalada ku dhow oo loo cayimo saldhigga basaska. Magaalo dalaka la jaarka ah oo taas oo kale laga sameeyey, guusha ay gaadhay ayey goluhu ku qanceen inay tahay suurtoagal in Xanfaley laga sameyn karo. Mar haddii la hirgaliyo rakaabka imanaya iyo kuwa dhoofayaba waxay ku qasban yihiin inay basaska ku sugaan saldhigga basaska waqtiyada u cayiman, halkey kaga sugi lahaayeen cidhifyada jidadka magaaladda. Rakaabka basaska sugaya oo buuqaya iyo dirawaliin waddada xidhay oo qaylo dheer waxay noqonayaan wax laga baxay.

Golaha magaalada Xanfaley marna muwqif cad kamay qaadan ha ahaato mid taageero amase mid ku lid ah shirkadaha basaska. Maqnaanshaha mawqif cad oo goluhu qaato, awgeed ayey mulkiilayaasha basasku u qaateen inay dhaqankani fasax u yahay fikirka goluhu ku riday argagax iyo maroora-dilaac.

Arrinta waxa sii murgiyey iyadoo ay ku jiraan maalqabeenno shisheeye ah oo ka yimid dalal deris ah, isla mar ahaantaana maal badan geshay shirkadaha basaska Xanfelay.

Dhisidda Xarunta dhexe ee basaska, maalgeliyaasha basaska way baqa gelisay iyagoo u arka aragtida golaha mid aan siinayn rakaabka basaska fursadii ay u baahnaayeen. Sidaas darteedna dakhligooda waxweyn u dhimaysa. Maalq-beennadaasi waxay doonayaan in goluhu faraha kala baxo ganacsiga basaska Xanfaley, waxay u diyaar yihiin inay dagaal qadhaadh galaan haddii laga maarmi waayo.

**Su'aalo:**

1. Waa maxay dibaataada go'aamintu? Si kooban u qeex
2. Waa kuwee tallaabooyinka ay tahay inuu goluhu raaco si ay u xaliyaan dhibaataada?
3. Waa kuwee doorashooyinka iyo natiijooyinka laga filan karo talaabo kasta oo la qaado?
4. Iyadoo aynno ognahay gebegabada lagu gaadhay su'aalaha hore, sideebuu goluhu u abaari karaa doonaa go'aaminta dhibaataada?
5. Waa maxay saameynta ay Xaaladda ku yeelan karto go'aan qaadashada golaha?

### 3.7: Layli: Gudbin xirfadeed

**Waqtiga: 30 – 45 daqiiqo**

**Ujeedo:**

Layligani waa inuu ka-qayb-galayaasha ka caawiyaa siday waayo-aragnimadii waxbarasho ee ay ka heleen aqoon-isweydaarsiga uga dhigi lahaayeen hawlo ay u adeegsadaan fulinta hawlaha aduunyo ee ay ugu horeeyaan kuwa xildhibaanimadu. Layligani wuxuu xoogga saarayaa hiy-gacanta, iyo ku hawlanaanta qorshe run ah, iyo inay yeeshaan ka-go'naan. Hawsha badideeda waa lagu fulinayaa heer qof ahaaneed iyo wadaag xidhiidh xildhibabada dhexdooda ah.

**In aad arrin garato iyo in aad fuliso wax weyn baa u dhexeeya.**

Waxa la isku raacsan yahay in ujeeddada laga leeyahay tababarada ay tahay inay kor u qaadaan si ay dadku wax u qabtaan, iyadoo la tusayo sidaas si ka wanaagsan. Guusha waayo-aragnimada laga helo tababarada waxa lagu qiimeeyaa wax qof kasta u kordhaya iyo isbedel ku dhaca inta uu tababarku soconayo iyo tababarka kadib-ba.

Sida runta ah saamaynta uu aqoon isweydaarsi ku yeesho ka-qayb-galayaasa ma aha ta uu tababaruhu filayo, siiba saacado yar ka dib. Farxadda iyo u riyaaqa hababka cusub ee uu ka kasbay tababarku si dhakhso ah ayey u shiiqaan marka la tababarihii ay soo waajahdo dabeecado waxqabad oo gaboobay iyo cadaadis kaga yimaada kuwo uu la shaqaynayo ee aan la wadaagin waayo-araga tababarka.

Tan kale, ka-go'naanta xildhibaanaka inuu wax barto, isbeddelna dhaco, waqtiga xidhiidhanka aqoon-is-weydaarsiga ayaa ka caawiya inay ka guulaystaan cadaadiska ka yimaado naftooda iyo goobta shaqada. Tababare wuxuu la-tababaraha ka caawiye siday ugu guuri lahaayeen aduunyada waxbarashadda una gaadhi lahaayeen aduunada wax-qabad iyagoo adeegsanaya layliyo fudud oo qorshayn ah. Tan ka feker. Waqtiga ay qaadato ku-dhiirgelinta gudbinta aqoon heliddu waa faraaq u dhexeeya indho fur kooban iyo aaraa xiiso-gelin iyo waayo –aragnimo cimrigaagoo dhan ah.

**Hab-raac:**

Ku qaado ugu yaraan saacad badhkeeda ka dib dhamaadka aqoon-isweydaarsiga, adigoo ka-qayb-galayaasha ku jeediso aragtidda waxyaalaha ugu mudan barashada, kuna dhiirgeli inay barashooyinkii tijaabo geliyaan golaha gudhiisa, sii ka-qayb-galayaasha 15 daqiiqo oo ay u shaqeeyaan kali ahaantooda waxbarasho fudud oo ku salaysan wareysi gudbiya xirfadaha.

Ka qayb-galayaashu markay dhameeyaan wareysiga, ka codso inay si dhakhso ah ula wadaagaan labo ama saddex shay oo ay doonayaan inu si ka duwan u qabto goluhu jaakuubtiida gi'aan qaadasho. Taasna ku soo gebogebee aqoon-is-weydaarsiga.

## WEYDIIMO GUDBINTA XIRFADEED

Mudo daqiiqado ah dib u eeg kaalintaada go'aamiye, fekeradaha cusub ee aad heshay aqoon-is-weydaarsiga, iyo dareenka aad kuwas ka qabto. Dabeedna qor weedh ama laba weedhood oo ku tilmaamayso waxa ku xiisa-geliyey ee aad qof ahaantooda iska baratay muddadii aqoon isweydaarsiga.

---

---

---

Adigoo ka shdiaal qaadanaya waxaad qof ahaantaada ka baratay mudadii aqoon isweydaarsiga, sheeg mid ama laba shey oo aad damacsan tahay in goluhu kaalintiisa go'aan-qaadasho aad jeceshahay sidii wax u saman jirta wax ka beddelo.

1. \_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_

Ugu dambeyn waa macay carqaladaha naftaada ku jiraa maa goobta shaqo ee aad filayso inaad waayo-aragto markaad fulinayso isku-dayo wax beddelid? Maxaad ku samayun si aad meesha uga sarto ama aad u yarayso carqaladahaas.

**Carqaladda**

**Tabaha carqaladda lagu saarayo**

1. \_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_

1. \_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_

**Hadaad baran karto waad qaban kartaa**

## **PRIORITY ONE WORDS**

### **ENGLISH**

1. Accountability
2. Action plan
3. Active Listening
4. Alternative
5. Application
6. Assessment
7. Authority
8. Awareness
9. Basic Education
10. Beneficiary
11. Capacity Building
12. Case Study
13. Check list
14. Civic
15. Collaboration.
16. Committee
17. Communicator
18. Community

### **SOMALI**

- Xisaabtan**
- Xilkaa Saaran yahay
- Qorshe hawleed.**
- Wax-qabad hawleed
- dhegaysi feejigan**
- Dhegaysi Darban
- Dhegaysi Mug leh.
- Kala Doorasho**
- Wax bedeli kara wax kale
- Arji**
- Codsi
- Adeegsi
- Qiyaasid**
- Qiimayn
- Suldada**
- Awood xukun
- **Wacyi-galin**
- Ka war qab
- Wax-barasho Asaasi ah.**
- Dan ku Qabe**
- Ka faa'iidayste
- Kobcin wax Qabad**
- Awood dhisid.
- Daraasad Xaaladeed**
- Liis Hubineed**
- Madani**
- La xiriira magaalo
- muwaadin
- Gacan siin**
- Wada shaqayn
- Is Caawimid
- Guddi**
- Gaarsiye**
- Isgaadhsiye
- Beel**
- Jaaliyad

|                           |   |
|---------------------------|---|
| 19. Community Development | - <b>Horumarin Beeleed</b><br>-Horumarin Jaaliyadeed            |
| 20. Concepts              | - <b>Figrado</b><br>-Aragtiyo                                   |
| 21. Conceptual Hat Rack   | - <b>Figrada Metalaada Xilaalka</b>                             |
| 22. Conflict              | - <b>Is-qabad/Khilaaf</b><br>- Iska hor imaad                   |
| 23. Consensus             | - <b>Rayi la isku raacay</b><br>Aqbalaad figrad guud            |
| 24. Consequently          | - <b>Natiijo</b><br>-Cawaaqib                                   |
| 25. Constituency          | - <b>Dagaan Doorasho</b>  |
| 26. Co-operation          | - <b>Iskaashi</b><br>Wada shaqayn                               |
| 27. Council               | <b>Gole</b>   |
| 28. Councilor             | <b>Xil-dhibaan Degaan</b><br>Xubin ka tirsan Gudiga degaanka    |
| 29. Counter productive    | - <b>Maax Dumin</b><br>-Lid ku ah.                              |
| 30. Criteria              | - <b>Cabirka wax lagu saleeyo</b><br>Qoddobbo wax lagu saleeyo. |
| 31. Critique              | - <b>Wax lagu Saleeyo</b>                                       |
| 32. Decision Maker        | - <b>Goa'aamiye</b>   |
| 33. Definition            | - <b>Qeexid.</b>  |
| 34. Delegation/Delegate   | - <b>Wefti</b><br>-Ergo   |
| 35. Democracy             | - <b>Demoqraadiyad</b>  |
| 36. Description           | - <b>Tilmaan</b><br>-Sifo<br>-Sharax                            |
| 37. Dialogue              | - <b>Wada Hadal</b>   |
| 38. Effective             | - <b>Wax ku ool</b><br>-Sidii la rabay wax u tarid.             |
| 39. Effective leadership  | - <b>Hogaaminta wax ku oolka ah.</b>                            |
| 40. Efficiency            | - <b>Wax qabad fiican leh</b>                                   |
| 41. Elected Leadership    | - <b>Hogaaminta la doortay</b>                                  |
| 42. Empower/Empowerment   | - <b>Awood siin</b><br>-Awood u fasaxid                         |

|                         |                                 |
|-------------------------|---------------------------------|
| 43.Enabler/Enable       | <b>-Awood siin</b>              |
|                         | -Karti siin                     |
| 44.Essay                | <b>-Qormo</b>                   |
|                         | -Maqaal                         |
| 45.Ethical              | <b>-Hab-dhaqan</b>              |
| 46.Evaluation/Evaluate  | <b>-Qiimayn</b>                 |
| 47. Evaluation Survey   | <b>-Qiimayn Sahan</b>           |
|                         | -Baaritaan qiimayneed           |
| 48.Exercise             | <b>-Layli</b>                   |
| 49Facilitator           | <b>Fududeeye/Sahle</b>          |
| 50.Feed back            | <b>War Celin</b>                |
|                         | Jawaab Celin                    |
| 51.Financier            | <b>-Masuul Maaliyadeed.</b>     |
| 52.Gender               | <b>-Jandar</b>                  |
| 53.Goal                 | <b>-Hadaf</b>                   |
|                         | -Gool                           |
| 54.Good Governanace     | <b>-Hab Xukun Wanaagsan</b>     |
|                         | -Hab Maamul                     |
| 55.Government           | <b>-Xukuumad</b>                |
| 56.Group Discusion      | <b>-Dood kooxeed</b>            |
| 57.Guide                | <b>-Tilmaamid</b>               |
|                         | -Hage                           |
| 58.Hand Book            | <b>-Tilmaan Bixiye</b>          |
|                         | -Tilmaame Bare.                 |
| 59.Human Resources      | <b>-Khayraadka Dadka</b>        |
| 60.Human Settlement     | <b>-Degsiimooyinka Aadanaha</b> |
|                         | Degaamayn                       |
| 61.Implementation       | <b>-Hirgalin</b>                |
|                         | -Fulin                          |
| 62.Information          | <b>-Xog</b>                     |
|                         | -Wargelin                       |
| 63. Institution         | <b>-Haya'ad</b>                 |
| 64. Institution Builder | <b>-Haya'ad Dhise</b>           |
| 65.Institutionalize     | <b>-Haya'deeye</b>              |
| 66.Instruction          | <b>-Amar</b>                    |
|                         | -Wax barasho                    |
|                         | -Wax barid                      |
| 67.Key Point            | <b>-Qoddobbo Muhiim ah.</b>     |
|                         | Qoddobbo Ma Dhaafaan ah         |

|                                |   |
|--------------------------------|---|
| 68. Leadership Process         | <b>-Geedi socod Hoggaamineed</b>                              |
| 69. Learning                   | <b>-Barasho</b><br>-Wax Barasho<br>-Tacliin Barasho           |
| 70. Learning Objective         | <b>-Ujeeddooyinka Barashada</b><br>Yoolka Barashada           |
| 71. Local Government/Authority | <b>-Dawladda Hoose</b>  |
| 72. Majority                   | <b>-Aqlabiyad</b><br>-Inta Badan                              |
| 73. Management Process         | <b>-Geedi Socodka Maaraynta</b>                               |
| 74. Meeting                    | <b>-Kulan</b><br>-Shir  |
| 75. Minority                   | <b>-Inta Yar</b><br>-Laga tiro yar yahay                      |
| 76. Minutes                    | <b>-Hadal Qor</b><br>-Hadal qoraal                            |
| 77. Mission                    | <b>-Ergo</b><br>-Risaalo                                      |
| 78. Monitoring                 | <b>-La socod</b><br>-La saan qaad                             |
| 79. Negotiation/Negotiator     | <b>-Wada Xaajood siiye</b><br>-Wada Hadal siiye<br>-Gorgoriye |
| 80. Networking                 | <b>-Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya</b>         |
| 81. Organization               | <b>-Urur</b>  |
| 82. Over seer                  | <b>-Korjooge</b>  |
| 83. Over view                  | <b>-Dulmar/Guud Mar</b>                                       |
| 84. Participants               | <b>-Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha</b>                 |
| 85. Perception                 | <b>-Faham/Dhugmo/Garasho.</b>                                 |
| 86. Performance                | <b>-Waxqabad/Fulin Hawleed.</b>                               |
| 87. Perspective                | <b>-Ka eegid wajio kala duwan.</b>                            |
| 88. Policy                     | <b>-Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad</b>                        |
| 89. Policy Maker               | <b>-Siyaasad Dejiye</b>                                       |
| 90. Power Broker               | <b>-Awood wax ku qabte/Awood adeegsade</b>                    |



|                             |  |  |
|-----------------------------|--|--|
| 91. presentation            | - <b>Soo Bandhigid/Qadimaad</b>  |  |
| 92. Proactive               | - <b>Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac</b>  |  |
| 93.Process                  | - <b>Geedi socod/Socodka</b>   |  |
| 94.Questionnaire            | - <b>Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah</b>                               |  |
| 95.Quoum                    | - <b>Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo</b>   |  |
| 96.Rational                 | - <b>Maan-gal/Macquul</b>  |  |
| 97.Reactive                 | - <b>Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug</b>   |  |
| 98.Refrence                 | - <b>Tixraac/Raad raac</b>   |  |
| 99.Reflection               | - <b>ilays noqod/Humaag noqod</b>  |  |
| 100.Resources               | - <b>Khayraad.</b>   |  |
| 101.Revenue                 | - <b>Dakhli</b>  |  |
| 102.Role play               | - <b>Door-jelid/Door ciyaarid</b>  |  |
| 103.Session                 | - <b>Fadhi/Kulan</b>   |  |
| 104.Shared Vision           | - <b>Aragti wadaag</b>   |  |
| 105.Simple Majority         | - <b>Aqlabiyad hal dheeri ah.</b>  |  |
| 106.Simulation              | - <b>Iska yeelid/U ekeysiin</b>  |  |
| 107.Slums                   | - <b>Buul caws/Carshaan/Isku raran</b>   |  |
| 108.Solution                | - <b>Furdaamin/Xal</b>   |  |
| 109.Stakeholders            | - <b>Daneeyayaal.</b>  |  |
| 110.Strategic Plan          | - <b>Qorshe istaratijiyadeed.</b>  |  |
| 111.Strategy                | - <b>Istaratijiyad/Tab/xeelad</b>  |  |
| 112.Summary                 | - <b>Soo koobid/Khulaaso</b>   |  |
| 113. Symptoms               | - <b>Astaamo/ Calaamado</b>  |  |
| 114. Systamatic             | - <b>Habaysan/Nidaamsan</b>  |  |
| 115.Technique               | - <b>Farsamo/Xeelad.</b>   |  |
| 116.Training Design.        | <b>JaanjooyadaTababarka</b> /Naqshadeynta Tababarka  |  |
| 117.Training Material.      | - <b>Agabka</b> <b>Tababarka/Qalabka</b><br>Tababarka                                      |  |
| 118.Traing Need assessment. | - <b>Qiyaasid</b> <b>baahida</b><br><b>Tababarka/Qiimeynta</b> <b>Baahida</b><br>Tababarka |  |
| 119.Transparency.           | - <b>Wax qaris laa' aan</b>  |  |
| 120.Transparent             | - <b>Qof aan waxba qarainaynin.</b>  |  |
| 121.Unanimous               | - <b>Loo dhan yahay/Gedigood.</b>  |  |

|                              |   |
|------------------------------|---|
| 122.Vision.                  | - <b>Aragti fog</b> /Aragti dheer               |
| 123.Warm up exercise         | - <b>Iskulalayn</b> /Qandhicin/Diiran           |
| 124.Workshop.                | - <b>Aqoon Isweydaarsi.</b>                     |
| <b>Priority two words.</b>   |   |
| 125.Acknowledgment           | - <b>Garwaaqsi</b> /Garawsi/Mahad-celin         |
| 126.Administrative Fixes.    | - <b>Adeegsi</b>                                |
| 127.Analysis                 | - <b>Gorfeyn</b> /Falanqeyn/Taxliil.            |
| 128.Assignment.              | - <b>Shaqo Mucayin ah</b>                       |
| 129.Assuption                | - <b>Maleyn</b> /Si u qaadasho                  |
| 130.Benchmark                | - <b>Bar qiyaaseed</b> /Bartilmameed            |
| 131.Challenges               | - <b>Caqabad</b> /Loolan/Hardan                 |
| 132.Collective               | - <b>Kooxeed</b> /Urureed/Wadareed              |
| 133.Conceptual frame work    | - <b>Gadaan-fikradeed</b> /Aasaas fik           |
| 134.Constructive             | - <b>Wax dhisid</b> /Dhismo-gal                 |
| 135.Conventional Wisdom      | - <b>Xikmad soo jireen ah.</b>                  |
| 136.Corruption               | - <b>Musuq-maasuq</b> /Laaluush.                |
| 137.Dilema                   | - <b>Laba daran mid dooro</b>                   |
| 138.Diversity                | - <b>Kala duwanaa</b> n/Kala gedisnaa           |
| 139.Encouraging              | - <b>Dhiiri-galin</b> /Geesinimo galin.         |
| 140.Fundamental              | - <b>Asal</b> /Aasaasi.                         |
| 141.Identification           | - <b>Tilmaamid</b> /Baadi sooc/Aqoonsi.         |
| 142.Individual Contribution. | - <b>Gacan ka geysi qofnimo</b> /In qof biiri   |
| 143.Infrastructure           | - <b>Dhismo-hooseed.</b>                        |
| 144.Input.                   | - <b>Wax galin</b>                              |
| 145. <i>nsight.</i>          | - <b>Aragti Maskaxeed.</b>                      |
| 146.Inspiration.             | - <b>Maan-godlin</b> /Ra'yi fiican helid.       |
| 147.Interaction.             | - <b>Isdhex-gal</b> /isla fal-gal/Isku dhafmid. |
| 148.Judgement                | - <b>Xukun</b> /Go'aan                          |
| 149.Land Use Malaise.        | - <b>Aafada dhul boobka</b> /Dhul ku habsa      |
| 150.Multipurpose             | - <b>Ujeeddo badan</b> /Ujeedooyin kala du      |
| 151.Output.                  | - <b>Wax ka soo saarid.</b>                     |
| 152.Potential Candidate      | - <b>Musharax dihin</b> /Musharax iman kara     |
| 153.Pre-training.            | - <b>Tababar horaad</b> /Tababar hortiiis.      |
| 154.Priority                 | - <b>Mudnaan.</b>                               |
| 155.Problem Solver           | <b>Furdaamiye</b> /Xaliye dhib                  |

|                               |   |
|-------------------------------|---|
| 156.proficiency               | - <b>Xirfad Hanasho</b> /Aqoon sare u leh.  |
| 157.Public                    | - <b>Guud</b>   |
| 158.Public Sector.            | - <b>Qaybta Guud</b>  |
| 159.Public Service            | - <b>Adeeg guud.</b>  |
| 160.Regulation                | - <b>Xeer Hoosaad.</b>  |
| 161.Self Governance.          | - <b>Isxukumid.</b>   |
| 162.Self Introduction.        | - <b>Is-sheegid/Is-tilmaamid.</b>   |
| 163.Self study.               | - <b>Isbarid</b>  |
| 164.Self Assesment            | - <b>Isqiyaasid/Isqiimeyn.</b>  |
| 165.Shirinking Resources.     | - <b>Khayraadka sii yaranaya</b>  |
| 166.Technical                 | - <b>Farsamo/Farsamayn</b>  |
| 167Training needs.            | - <b>Baahi tababar.</b>   |
| <b>Priority three Words</b>   |   |
| 168.Absolute Poverty          | - <b>Saboolnimo</b>   |
| 169.Absolute                  | - <b>Gebi-ahaan/Buuxda.</b>   |
| 170.ApplicationCommitments    | - <b>Nidar-gal/Daba-qaad ballan</b>   |
| 171.Bureaucracies             | - <b>Biroqraadiyad/Xafiisyad</b> Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay                |
| 172.Caution                   | - <b>Taxadar/Digniin.</b>   |
| 173.Density                   | - <b>Cufnaan/Jirmiga shega.</b>   |
| 174.Environmental Degradation | - <b>Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka</b>                           |
| 175.Equilibrium               | - <b>Dheeli-tir/Is-le'eg</b>  |
| 176.Hawker                    | - <b>Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya</b>                                     |
| 177.Implication               | - <b>Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka.</b> |
| 178.Jurisdiction.             | - <b>Haya'addaha Garsoorka.</b>   |
| 179.Legal Requirment.         | - <b>Baahida Sharciyeed.</b>  |
| 180.Legislation.              | - <b>Xeer Degin.</b>  |
| 181.Legitimate                | - <b>Sharci ahaan/Qaanuun ahaan</b>   |
| 182.Matchmaker                | - <b>Isku aadiye wax isku habboon</b>   |
| 183.Misinterpretation         | - <b>Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan</b>  |
| 184.Off-spring                | - <b>Farac.</b>   |
| 185.Optimistic                | - <b>Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg</b>                             |

|                             |   |
|-----------------------------|---|
| 186.Partnership             | - <b>Wadaag</b> /Wada lahaansho.                        |
| 187.Pessimistic             | - <b>Xumo arag</b> /Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg      |
| 188.Phenomina               | - <b>Ifafaalayaal.</b>                                  |
| 189.Professional            | - <b>Xirfadle</b> /Xeel-dheeri                          |
| 190.Recycle                 | - <b>Sameyn celin</b> /Dib u nacfi galin                |
| 191.Rules.                  | - <b>Qawaaniin</b> /Xeer                                |
| 192.Status Quo              | - <b>Xaalad taagan</b>                                  |
| 193.Stimulation.            | - <b>Xiiso galin</b> /Fi-fircooni galin.                |
| 194.To Wear different Hats. | - <b>Xilqaad badnaan</b> /Kaalimokala duwan qaa         |
| 195.Waterpolution.          | - <b>Dikhaw</b> <b>Biyood</b> /Wasakhaw<br>Biyood/Dhiiq |
| 196.Facilitator             | - <b>Fududeeye</b>                                      |
| 197.Financier               | - <b>Masuul Maaliyadeed</b>                             |
| 198.Gender                  | - <b>Jandar</b>   |
| 199.Negotiator              | - <b>Wada hadal siiye.</b>                              |
| 200.Overseer                | - <b>Korjooge.</b>                                      |
| 201.Policy Maker            | - <b>Siyaasad dejiye</b>                                |
| 202.Power Broker            | - <b>Awood wax ku Qabte.</b>                            |
| 203.Institution Builder     | - <b>Haya'ad dhise</b>                                  |
| 204.Leader                  | - <b>Hogaamiye</b>                                      |
| 205.Leadership              | - <b>Hogaamin</b>                                       |